Year 2 No 19 May 1978

# HALGAN

(THE STRUGGLE)
ORGAN OF THE SOMALI
REVOLUTIONARY SOCIALIST PARTY

## ☼THE ROLE OF THE TRADE UNIONS IN THE DEVELOPMENT OF THE SOCIETY.

SEC. GENERAL SPEECH ON 1st MAY

## ☼THE POLICY OF NON-ALIGNMENT AND CUBA`S POSITION

## ☼15th MAY: SYMBOL OF STRUGGLE AND STRENGTH

## ☼ON INFLECTIONS IN THE SOMALI LANGUAGE.

Struggle to learn, in order to learn to struggle better

# HALGAN

published monthly by the CENTRAL COMMITTEE of the SOMALI REVOLUTIONARY SOCIALIST PARTY

THE EDITORIAL BOARD

MOHAMED ADEN SHEKH/Chairman

ABUKAR MOHAMED HUSSEIN (Ikar)/Secretary

MEMBERS OF THE EDITORIAL BOARD

Hussein Mohamed Adam

Rashid Sheck Abdullahi

Said Abdisalam

Yusuf Suleyman

SUBSCRIPTION

**Somalia**
2/= shillings (Somali) per issue,
40/= shillings per year, post included.
**Arab World and East Africa**
$ 12.00 per year, airmail post included.
(US dollars).
**South Central and West Africa**
$ 17.00 per year, airmail post included.
**Asia**
$20.00 per year, airmail post included.
**Europe**
$ 25.00 per year, airmail post included.
**America (North and (South)**
$30.00 per year; airmail post included.

# TUSMO

I DAYMADA
MA RUN BAA? 2
II ARRIMAHA SIYAASADDA, DHAQAALAHA IYO BULSHADA
— 15 Maajo: Astaan Halgan iyo Ilays Dhallınyaro 4
— Maxamed Daahir Afrax
III NOLOSHA XISBIGA
— Xogsatada Soomaaliyeed iyo Xuskii 1da Maajo 6
— Xaflad lagu maamuusay Maalinta Shaqaalaha 7
— Wafdi saaxiibtinnimo 8
— 7da Maajo: Maalintii qaramaynta 9
— Damaashaadkii dhallınyarada ee 15ka Maajo 9
— Sannadguuradii 3aad ee Machadka Culuunta Siyaasadda 12
— Xil xisbiyeed lala kala wareegey 12
— Dhaqdhaqaaqa Degmooyinka 13
IV ARRIMAHA DUNIDA
— Dawladaha dhexdhexaadka iyo mawqifka Kuuba 14
— Taariikhdu ma saamaxi doonto Kastaro 16
— Cabdi Cawaale Jaamac
V WARBIXINTA BISHA
— Jaalle Siyaad oo booqday Masar iyo Sucuudi Areebiya 17
— Siminaar loo furay Hoggaamiyeyaal 18
— Aqoon isweydaaris Warfidiyeen 18
— Duqa Baqdaad oo yimid Muqdisho 19
— Booqashadii Guddoomiyaha qaybta Horumarinta Suuqa Dhaqaalaha Yurub. 20
— Bannaanbax Taageero 20
— Sannadguuradii 15aad ee J.G.S. Abbo 21
— Xadgudubka Kuuba ee Mabaadiida dhexdhexaadnimo 22
— Shir Jaraa'id 22
— Afhayeenno ka warramay xaalada Eriteriya 24
VI HIDDAHA IYO DHAQANKA
— Qiimaha Isbeddelka ereygu ku leeyahay Af-Soomaaliga 25
— Wajiyada suugaantii gumeysi — diidka 27
Gaarriye
VII ARAGTIDA CILMIGA AH
— Sida Hantiwadaagga u arko horukaca taariikheed 29
— Maxamed Cabdi Cali (Bayr)
VIII BUUGAAGTA IYO QORAALLADDA
— khudbaddii Xoghayaha Guud ee XHKS ee 1dii Maajo 31
— Khudbaddii Xoghayaha Guud ee XHKS ee xirtaanka aqoon isweydaarsigii warfidiyeennada 34
— Khudbadii Xoghayaha Guud XHKS ee 15kii Maajo 34

oo ku soo baxa afafka Soomaaliga
Carabiga iyo Ingiriiska.

S.B. 1204
Telefoon Lr. 720-51,74
Qolka Lr. 112
Guriga Ummadda
Muqdisho, JDS

CODKA RASMIGA AH EE GOLAHA DHEXE EE X.H.K.S.

Bishiiba mar — Sannadka 2aad — Tirsigii 19aad — Maajo 1978.
Qiimaha waa: 2 Shilin.

# DAYMADA WARGEYSKA

# MA RUN BAA?

Sida la wada ogsoonyahay Qaaradda Afrika waxay badankeed xoroowday lixdamaadkii. Dalalkaa xoroobay waxa u guntaday, halgan dheer oo wejiyo badan u galay dadyawgii degganaa. Afrika halkaas waxa kaga le'day dad fara badan, waxa uga baaba'ay dhaqaale farabadan waxaana lagula kacay xumaan iyo cariiqsi aan mitaal lahayn. Hase yeeshee waxay in badan hiil iyo hooba ka heshay dawladaha Hantiwadaagga ah iyo xoogagga horusocodka ah ee Adduunweynaha. Halgankaas dheer ka dib dawladihii gumeysan jiray way quusteen, waxayna taagtoodii iyo tabartoodii isugu ururiyeen:

1. Inay xoogeeyaan joogitaankooda goobaha qaarkood ee aan weli xoroobin (Afrikada Koonfureed, Simbaabwe, Jasiiradaha Badweynta Hindiya, IWM)

2. Inay hab cusub ee kor ka xukun ah soo rogaan, hoggaamiyaanna dhaqaalaha dawladaha xoroobay (gumeysiga cusub). Maanta goob joog waxaan u nahay in ay soo rogaal-celiyaan dawladihii horay Afrika u gumeysan jirey, ayna doonayaan inay intay u yar tahay waddammada qaarkood toos xoog ugu qabsadaan

Waxaa tusaale u ah, sida wurarku nagu soo gaarayaan, duullaanka lagu qaaday jasiiradihii Komoro (Comeres) kaas oo dibedda laga soo abaabulay, ay hoggaaminayeenna koox calooshooda-u-shaqeystayaal ah oo uu madax u yahay Jar-iska tuurkii Bob Denard. Ninkaasi wuxuu ka mid ahaa calooshooda-u-shaqeystayaashii Yurub ka soo duulay, si ay Koongo u qabsadaan, una joogaan laga bilaabo 1961-kii ilaa 1967kii. Wararkiisii u danbeeyeyna waxa lagu sheegay inuu ku nagaaday Magaalada Baaris. Kooxdaasu u hoggaaminayaa waxay kale ay qorsheeyeen inay isla markaa ku duulaan Jasiiradda Sishalis (Sychelles) taas oo aanay ku guuleysanin.

Haddaba yaa dabada uga jira calooshooda u shaqaystayaasha? maxaa keenay in sidaas loogu dhiirrado duullaan dibedda iyo gudaha la

gu qaado shucuub iyo dawlado xor ah, madaxdooda la laayo, xukunka loogala wareego? Sida la leeyahay, Denard timihii buu iska xiray, dharka hiddaha u ah jasiiraddana wuu xirtay, wuxuuna xubin ka yahay Gole Sare isku sheegga xukunka haysta.

Haddii arrintii sidaa tahay macnuhu waxa weeye xoogaggii gumeystayaashii hore ka gabbadeen ayaa itaalkoodii wax iska dhimay. Waxaan isleenahay meelaha dabacu ka yimid waxa u waaweyn:


1. Silaasadda uu Midowga Sofiyeeti iyo dawladaha ay isbahaystaan ku dhaqmaan oo ah soo faragelinta ay arrimihii Afrika u khaas ahaa ay soo farageliyeen; dawlado Afrikaan ah qaarkood oo ay hub iyo ciidammo farabadan ka buuxsheen (ama Kuuba ha ka yimaadeen ama dawladaha Yurubta Bari ha ka yimaadeene). Arrintaasi qaska ay Afrika ka dhex dhalisay ka sakow waxay xujo ku noqotay siyaasadii horusocodka ahayd ee Midawga Siyeeti, waxay curyaamisay dhaqdhaqaaqii iyo firfircoonaantii xoogagga horusocodka ah, waxayna gabbaad u noqotay Imberiyaaliyadda Adduunka si ay mar labaad xoog iyo bareerba ugu soo noqoto Afrika.

2. Afrikadii xoroowday iyo Ururkii Qaaraddu ay samaysatay oo maalinba maalinta ka dambeysa sii kala daadanaya, awoodna u la'inay si toos ah, oo geesinnimo leh, uga hor tagaan dhibaatooyinka qaaradda soo food saaraya. Waxay u muuqataa in Ururka la curyaaminayo, dawladihii Afrika ee xorta ahaana mid waliba arrimo kale lagu shuqliyey (ama ay isku shuqlisay) si aanay kaanshaba ugu helin inay madaxa kor u qaadaan oo ay waxa hareerahooda ka dhacaaya ugu dhabbo galaan.

Waxaa iswarsi leh, markaa, dawladda Midowga Sofiyeeti imisay dareensan tahay halistaas ay gelisay Qaaradda Afrika, imisa se madaxda Afrika arrintaas welwel ka hayaa?

Bisha Luuliyo ee soo socota waxa magaalada khartuum layisugu imanayaa fadhigii meertada ahaa ee Madaxweyneyaasha Dawladaha Afrika, waxaana shaki ku jirin in Dadweynaha Qaaraddani ka sugayo jawaab cad ee u qalanta weerarka lagu hayo iyo qeybsashada cusub ee aan ka duwaneyn tii Berliin 1884kii ee lala damacsan yahay.

ARRIMAHA SIYAASADDA, DHAQAALAHA IYO BULSHADA



# 15ka Maajo ASTAAN HALGAN IYO ILAYS DHALLINYARO

MAX'D DAAHIR AFRAX

Bisha Maajo sannad walba waxay soo gashaa iyadoo xambaarsan farxad iyo raynrayn ay u siddo xoogagga kacaanka ah ee Soomaaliyeed. Soomaaliyada kacaanka ah waxaa caado u noqotay, marka Maajo soo dhowaato in la bilaabo olole xiisa leh oo loogu diyaar garoobaayo soo dhoweynta bishaa qiimaha taariikhiga ah leh.

Bisha horraanteeda waxaa lala dabbaaldegaa shaqaalaha horusocodka ah oo ay u caleema saaran tahay 1da Maajo, maalinta shaqaalaha adduunka isla markaasna ah maalintii uu dhismay Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed.

Damashaadkii iyo Xafladihii xuska maalinta Shaqaalaha raadkoodii oo weli sii qoyan, magaalooyinka oo weli ku xashaashaya calammadii kala jaadka ahaa, nalalalkii kala midabka ahaa iyo tabbeelayaashii kacaanka ahaa; ayaa waxaa soo gashay 15ka Maajo, maalinta dhallinyarada Soomaaliyeed; markaasay dhallinyaradu shaqaalaha kala wareegtaa xilkii hoggaaminta damaashadyada iyo martigelinta xoogagga horusocodka ah, kuwa dalkeenna iy kuwa dunida kaleba.

15KA MAAJO WAA HOOYADII MAALMAHEENNA TAARIIKHIGA AH.

Dhowr iyo toban ayay gaarayaan maalmaha taariikhiga ah ee aynu sannad walba u samaynno xus heer qaran ah, innagoo ku xusuusanayna qiime taariikheed oo ay ugu fadhiyaan Ummaddeennna, gaar ahaan waxay maalmahaasi aad u kordheen muddadii kacaanku jiray oo qaarkood taariikhda soo galeen, qaarna ka horreeyeen, laakiin aan qiimahooda la siin jirin, in kastoo la wada ogyahay, sannad kastana la isku baraarujiyo munaasabaddii ay maalin waliba taariikhda kuu gashay iyo dhumucda qiimaheeda, haddana waxaa laga yaabaa dadka badankiisu in aysan u fiirsan sida ay maalmahaasi u kala da' weyn yihiin.

15ka Maajo waa maalinta ugu da' weyn maalmaha waddaniga ah ilaa iyo hadda laga xuso dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya. Munaasabad waddani ah oo sannad walba la xusana waa mid dii ugu horraysay dalkeenna. Afartanaadkii qarnigaan waxay ahayd maalinta keli ah oo loogu dabbaaldego xusuus waddanimo.

Lama mooga munaasabaddii ay 15ka Maajo taariikhda ku soo gashay, taasoo ah asaaskii ururkii la magac baxay Naadiga dhallinyarada Soomaaliyeed (S.Y.C.), 1943kii, ururkaas oo markii dambe isu baddalay Xisbi Siyaasi ah oo gobannimadoon ah, ahaana kii dadweynaha Soomaaliyeed u horseeday gobannimada ay maanta harsanayaan lala ka mid ah shanti qaybood ee gumeystayaashu dalkeenna u kala jabsadeen.

Sanooyinkii afartanaadka, oo ahaa muddadii Xisbigii SYL ka fayoobaa aafada gumeysiga cusub, ahaana horusocod dhab ah oo gobannimadoon ah, sanooyinkaa oo dhan waa la xusi jiray 15ka Maajo, maalintii dhallinyarada Soomaaliyeed soo shaac bixiyeen fikraddii gobannimadoonka ee lagu guulaystay.

Isu sheegid ma leh halkii uu ku dambeeyey Xisbigii isaga ahaa, nasiib darro ayay noqotay in ay curyaamiso suntii uu u qooshay gumeysiga cusub, ka dibna uu noqday qalab gumeysigaasi ku adeegto. Hase yeeshee taas waxba ku sii dheeraan maynno, si aynaan uga fogaan arrintii aan ka hadlaynay oo ahayd qiimaha taariikhiga ah ee 15ka Maajo, qiimahaas oo aysan dhaawici karin aayatiin xumadii uu ku dambeeyey Xisbigii maalintaas la unkay. Qiimaha dhabta ahi kuma jiro raadraaca dhacdooyinka socodka taariikhda hal xisbi oo qura, balse wuxuu ku jiraa socodka taxanaha taariikhda isbeddelka bulshada iyo wixii ay ka tartay fikraddii soo shaacbaxday maalintaas iyada ah, sidii uu Jaalle Siyaad shaaca ka qaaday markii uu ka hadlaayey xuskii maalintaas ee lagu qabtay Golaha Murtida iyo Madadaalada.

MAALMO WAAWEYN WALISE MUGDI KU JIRA:

Isla markaas, marka aan tilmaamaynno qiimaha taariikheed ee 15ka Maajo, yaan loo qaadan in aan ku doodaynno in ay tahay maalintii ugu horreysey ee ay dhalatay fikrad loogu horseedayo gobannimada shacbiga Soomaaliyeed.

Dhab ahaan gobannimadoonka Soomaaliyeed aad buu uga da'weyn yahay 15kii Maajo, 1943kii. Cidina ma mooga dhaqdhaqaaqyadii kacaaneed ee ay hoggaaminayeen halyeeyaashii caanka ahaa Axmed Gurey, Sayid Maxamed Cabdulle Xasan iyo Daraawiishtiisii iyo kuwii kalaba, iyagoo hubka u qaaday difaaca madaxbanaannida Ummadda Soomaaliyeed.

Hase yeeshee, wax laga xumaado, walibana laga yaxyaxo waxaa ah in aynaan maanta rasmi ahaan u hayn maalintii iyo xataa bishii uu soo baxay mid kastoo ka mid dhaqdhaqaaqyadaasi. Sababta ugu waynina waa afkeenna oo aan waagaas qornayn, taariikhdana la kaydin jirin, iyo iyadoo aan weli taariikhda Ummaddeenna lagu samayn baaris cilmiyeed oo tifaftiran. Inkastoo muddadii kacaanku jiray arrintaas dadaal badan laga sameeyey, walina lagu hawl jiro, haddana heerkii la doonaayey lagama gaarin. Sidaa awgeed, dhaqdhaqaaqii Ururka dhallinyarada Soomaaliyeed ayaa wuxuu noqday midka ugu horreeya ee ilaa iyo hadda rasmi ahaan loo hayo maalintii uu bilawday; waana sidaas sida aan 15-ka Maajo ugu tilmaamayno in ay tahay maalinta ugu da' weyn maalmaha waddaniga ah ee dalkeenna rasmi ahaanta looga xuso waqtigan la joogo. Waase laga yaabaa mustaqbalka soo socda in daaha laga qaado maalmaha ka da'da weyn ee baadigoobkooda lagu jiro, ama loo baahan yahay.

KACAANKA OKTOOBAR IYO WEYNEYNTA MAALMAHA TAARIIKHDA LEH.

Kacaanka 21kii Oktoobar markii uu curtay wuxuu ku dadaalay qayb-bulsheed kasta (Sociay strata) in la abaabulo, la mideeyo laguna barbaariyo jidkii ay ku dhismi lahaayeen, kuna gudan lahaayeen horumar bulsheedka hayaanka loo yahay. Hay'addii kacaanku u xilsaaray dhaqan gelinta himiladaas kacaannimo, waxay ahayd Xafiiskii Siyaasadda ee Madaxtooyada GSK, kaasoo qayb-bulsheed kasta u sameeyey laan u gaar ah sida Shaqaalaha, Dhallinyarada, Haweenka iyo Iskaashatooyinka.

Qaybahaas aan soo xusnay mid kastoo ka mid ah waxaa loo caleema saaray maalin astaan u ah halgankooda kacaaneed, maalintaasoo ay ku dhaataan, kuna tilmaansadaan habeendhaxa socodka halgankooda. Isla markaas maalmaha la caleema saaray waxay ahaayeen maalmo horeba qiimo taariikheed ugu fadhiya bulshada Soomaaliyeed iyo xoogagga horusocodka ah ee adduunka; sida 8da Maarso maalinta Haweenka dunida, 1da Maajo maalinta Shaqaalaha Adduunka iyo 15ka Maajo maalintii dhaqdhaqaaqa gobannimadoonka ah ee dhallinat Soomaaliyeed.

Muddadii kacaanku jiray sannad kasta maalmahaas waxa loo samayn jiray dabbaaldeg ay qabanqaabisay qayb-bulsheedka ay maalintaasi ku magacaaban tahay dhismihii Ururrada Bulshada mid kasta waxaa lagu beegay maalintii qiimaha gaarka ah u lahayd, isla markaasna muujinaysa Ururrada Bulshada Soomaaliyeed in ay yihiin qayb aan ka go'i karin xoogagga horusocodka ah ee adduunka; kuwaasoo ay ka kooban tahay jabhadda ka soo horjeedda imbiryaalayadda iyo gumeysiga, una halgamaysa xorriyadda, dimoqraaddiyadda iyo hantiwadaagga.

URUR GU' JIRSADAY IYO XUS LABA JIBBAARMAY.

Xuskii 15ka Maajo Sannadkaan wuxuu la soo baxay dardar hor leh oo ay uga duwanayd sanooyinkii ka horreeyey. Dardartaa waxaa keenay miisaan hor leh oo ku soo kordhay. Miisaankaasi wuxuu yahay dhalashadii ururka dhallinyarada kacaanka Soomaaliyeed. 15kii Maajo ee sannadkan la bilawday tirsi cusub oo lagu tirinaayo da'da UDHKS, ururkaasoo sannadkan gu' jirsaday, sannad-guuradiisii u horeryseyna u dabbaaldegay.

Dhab ahaan UDHKS oo ay ka dambeeyaan dhallinyarada Soomaaliyeed ee Kacaaniinta ah wuu muujiyey qiimihii ay ka mudnayd maalintaas taariikhiga ah. Muddo toddobaad ah (13-18kii bisha) ayaa lagu jiray damaashaad iyo dabbaaldeg aan kala go' lahayn. Damaashaadyadaas oo heer walba lahaa, waxay isugu jireen Xaflado, bannaanbaxyo, kulanno, bandhigyo, tartanmo fan iyo isboortiba leh iwm. Wuxuu ahaa dabbaaldeggii ugu ballaarnaa ee munaasabadaas lagu xusay.

Dabbaaldegga dhallinyaradu had iyo jeer wuxuu leeyahay dhadhan gooni ah, dhadhankaas oo ay u samayso firfircoonida iyo xammaasadda u gaarka ah dabeecadda Dhallinyarada. Daamaashaadyadii xuska maalintooda waxa dhallinyarada kala qaybgalay madaxda dalka oo uu hormuud u yahay Xoghayaha Guud XHKS, Madaxweynaha JDS, Jaalle Maxamed Siyaad Barre, oo ay caado u tahay in uu bulshada Soomaaliyeed qaybaheeda kala geddisan kala wada qaybgalo hawlaha ay ku hirgelinaayaan himilooyinkooda kacaannimo.

Jaalle Siyaad, wuxuu ka qayb galay xaflad ballaaran oo 15kii Maajo lagu qabtay Golaha Murtida iyo Madadaalada halkaasoo uu ka jeediyey khudbad qaayo leh oo dhallinyarada Soomaaliyeed u noqonaysa hub cusub oo wax-ku-ool ah halganka ay ugu jiraan dhismaha bulshada cusub iyo difaaca qarannimada dalkeenna.

Waxa kaloo Ururka Dhallinyarada dabbaaldeggiisii kala qayb galay, hambalyo iyo taageerana isla garab taagay, Xisbiga Hintiwadaagag Kacaanka Soomaaliyeed, Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed, Ururka Dimoqraaddiga ah ee Haweenka Soomaaliyeed, ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed iyo Ciidammada qalabka Sida. Waa caado ay leeyihiin xoogagga horusocodka ah ee Soomaaliyeed in ay iskaashi iyo istaakulayn ku fuliyaan hawlahooda.

Wargeyska Halgan wuxuu UDHKS ugu hambalyaynayaa sannadguuradiisa 1aad, wuxuuna u rajaynayaa in uu ku guulaysto meelmarinta farriinta taariikhiga ah ee ay ka sugayso bulshaweynta Soomaaliyeed.

## NOLOSHA XISBIGA

# Xoogsatada Soomaaliyeed iyo xuskii 1da Maajo



1da Maajo oo ah maalinta Shaqaalaha Adduunka, sannadkanna ku soo beegantay sannadguuradii 1aad ee aasaaskii Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed ,xoogsatada dalkan JDS waxay ku soo dhaweysey farxad iyo niyad kacaannimo.

Habeenkii 29kii Abriil, dhammaan golayaasha hanuuninta ee degmooyinka dalka waxaa lagu qabtay xaflado lagu soo dhoweynayey maalintaa weyn, loogana warramayey taariikhda halganka Shaqaalaweynaha ad duunka, guud ahaan iyo shaqaalaha Soomaaliyeed gaar ahaan. 30kii Abriil gabnimadeediina dhammaan magaalooyinka waaweyn waxaa laga sameeyey bannaanbaxyo lixaad leh oo ay ka qaybgaleen shaqaalaha Soomaaliyeed iyo xoogagga kalee horusocodka ah oo taageeraayey.

Magaala madaxda Muqdisho haddaan tusaale ahaan u soo qaadanno, bannaanbixii galabtaa ka dhacay wuxuu ahaa mid xiise weyn leh. Jidadka waaweyn ee magaalada Xamar waxa isugu soo baxay dadweyne tiradoodu kor u dhaaftay Boqol kunoo qof kuwaa oo u badnaa Shaqaalaha magaal amadaxda, ayna wehesheen kooxo ka tirsan ururrada kale ee bulshada sida: Dhallinyarada, haweenka, Iskaashatooyinka, Ciidamma-Qalabka Sida iyo Dadweynaha 14ka degmo ee Gobolka Benaadir.

Xoogsatadaasi intii ay bannaanbaxa ku marayeen waddooyinka waaweyn, waxay ku dhawaaqayeen erayo ay ku ballanqaadayeen kordhinta tacabka, ilaalinta miraha Kacaanka ,daafaca dalka iyo xoojinta isbahaysiga shaqaalaweynaha adduunka ee la dagaallamaya Imberyaaliyadda, gumeysiga, cadaadiska iyo isku dulmaadka. Arrimahaasi wa... kaloo ka muuqdeen bo... ar ay siteen bannaanbaxa ...shu, kuwaasoo muujin



ayey guulihii xoogstada Soo maalieeyd gaartay muddadii kacaanku dalka maamulayey.

Xoogsatadaa oo bannaanbaxa samayneysey markii ay isugu yimid. Madaxweynuhu wuha Daljirka Dahsoon, waxa salaan sharaf ka qaatay Xoghayaha Guud XHKS, Madaxweynaha JDS Jaalle Maxamed Siyaad Barre, oo ku soo sharfay shaqaalaha inuu kala soo qayb galo damaashaadkoodii.

Madaxdii kale ee la socotey Madaxweynaha, waxa ka mid ahaa madaxweyne ku xigeennada Jaalle Xuseen Kulmiye Afrax iyo Jaalle Ismaaciil Cali Abokor iyo xildhibaanno ka tirsan Golaha Dhexe XHKS iyo Madax jagooyin sare ka haysa xisbiga, ururrada bulshada iyo Dawladdaba.

# Xaflad lagu maamuusay Maalinta Shaqaalaha

Habeennimadii 1da Maajo Golaha Murtida iyo Madaaddaalada waxaa lagu qabtay xaflad weyn oo la xiriirtay damaashaadkii loo samaynayey Xuska maalinta Shaqaalaha Adduunka, 1da Maajo, isla markaasna ku beegan sannadguuradii 1aad ee dhismaha XGUSHS.

Xafladdaa waxa hadal gaaban oo warbixin iyo soo dhoweyn isugu jiray ku furay Guddoomiyaha Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed Jaalle Maxamuud Cali Axmed. Guddoomiyuhu wuxuu magaca xoogsatada Soomaaliyeed Billad Dahab ah ku guddoonsiiyey Xoghayaha Guud ee XHKS. Madaxweynaha JDS. Jaalle Maxamed Siyaad Barre. Billaddaas oo ahayd tii ugu horreysay Billadda Geesiga Shaqada hantiwadaagga ah, Jaalle Siyaad wuxuu ku mutaystay sida kartida iyo hagar la'aanta ah ee uu uga shaqeeyo daryeelka danaha Shaqaalaha iyo kuwa Ummadda Guud ahaan.

Ka dibna Xoghayaha Guud wuxuu halkaas ka jeediyey khudbad taariikhi ah oo ay si weyn ugu riyaaqeen dadkii halkaas isugu yimid. Madaxweynuhu wuxuu khudbaddiisii ku billaabay hambalyo iyo bogaadin uu u jeediyey Shaqaalaha Soomaaliyeed iyo kuwa adduunweynahaba, xuska maalintaa qaayaha leh. Qodobbadii ugu waaweynaa ee Jaalle Siyaad khudbaddiisaa uga hadlay waxa ka mid ahaa:

1. Halgankii ay soo galeen Shaqaalaha Adduunku iyo kaalinta ay kaga jiraan Kacaanka Adduunweynaha.

2. Taariikhda Shaqaalaha Soomaaliyeed iyo kaalintii ay ka soo qaateen, welina kaga jiraan, dhismaha dalka, difaaciisa, kordhinta tacab soo saarka iyo horumarinta Bulshada ee dhinac kasta saameysa.

3. Xaaladda geeska Afrika iyo halganka xaqa ah ee ay ku jiraan jabhadaha Gobannima-



doonka Soomaali Galbeed, Abbo iyo Ereteriya.

4. Dacaayadda riqiiska ah ee ay isla dhexwareegayaan xoogagga Imberyaaliistaha ah iyo dib u socodka gudaha, kuwaasoo ay uga danleeyihiin in ay shacbiga Soomaaliyeed uga weeciyaan tubta toosan oo uu doortay, taasoo ah hantiwadaagga cilmiga ah.

5. Inqilaabkii dhicisoobay ee ay isku dayeen kooxdii yarayd oo dibusocod ahayd, una adeegaysey quwado shisheeye ah, si ay u waxyeelleeyaan guulih i shacbiga Soomaaliyeed gaaray muddadii kacaanka barakaysan mayalka u hayey.

Madaxweynuhu khudbaddiisaa xiisaha leh wuxuu ku soo gabagebeeyey ammaan uu u jeediyey xoogsatada Soomaaliyeed, guulihii dhaxalgalka ahaa ee ay ka soo hoysay hirgelinta himilooyinka kacaankii 21kii Oktoobar ee u dhashay daryeelka danaha dadweynaha Soomaaliyeed ee ay xoogsatadu horumuudka u tahay.

Madaxdii kale ee xafladdaas ka soo qayb gashay waxaa ka mid ahaa Madaxweyne ku xigeennada Jaalle S/Gaas Xuseen Kulmiye Afrax iyo Jaalle S/Guuto Ismaaciil Cali Abokar, Jaalle S/ Guuto Axmed Suleymaan Cabdalle oo saddexduba ka tirsan Guddiga Siyaasasiga ah ee XHKS, xildhibaanno ka tirsan Golaha Dhexe XHKS, danjirayaasha dalkeenna jooga iyo Madax kale.

# Wafdi saaxiibtınnimo

Bisha Maajo 9keedii waxaa dalka ka dhoofay wafdi ka socdey Xisbiga Shuuciga ah ee dalka Talyaaniga, iyagoo u sii jeeda dalkoodii. Wafdigaas oo muddo toddobaad ah dalka booqasho saaxiibnimo ku joogay, waxaa hoggaaminayey Jaalle Luigi Pestalozza oo ka tirsan qaybta dhaqanka ee Golaha Dhexe Xisbiga Shuuciga Talyaaniga, ahna nin qoraa ah oo Soomaaliya waxyaalo badan hore uga qoray.

Booqashada wafdigu waxay ahayd martiqaad saaxiibnimo oo XHKS ku marti-qaaday inay ka soo qayb galaan dabbaal degga 1da Maajo, maalinta xoogsatada adduunka; martiqaadyada noocaas ahina waa arrin horaba caa do ugu ahayd labada Xisbi.

Wafdigu waxay wada hadallo la yeesheen madax ka tirsan Golaha Dhexe XHKS oo ay ka mid yihiin Guddoomiyaha Hoggaanka Aydolojiyada Jaalle Dr. Maxamed Aadan Sheekh, Guddoomiyaha Hoggaanka Abaabulka Jaalle G/ Sare Cabdulqaadir Xaaji Maxamed iyo Guddoomiye Ku-xigeenka Hoggaanka Arrimaha Dibedda Jaalle Warsame Cali Faarax.

Wafdigaas ka socdey Xisbiga Shuuciga dalka Talyaaniga iyo



madaxda XHKS arrimihii ay ka wada hadleen, waxay ahaayeen ra'yi isweydaarsi ku saabsan xiriirka labada Xisbi iyo labada dal; iyo isbeddel tayeedka ka soc da labada dhinac.

Wafdigaas oo ka koobnaa 11 qof muddadii ay dalka joogeen waxay booqasho ku tageen Dan wadaagaha Beeraleyda iyo kalluumaysatada ee Kurtunwaarrey iyo Baraawe, halkaasoo ay soo arkeen, una riyaaqeen isbeddel bulsheedka ka socda iyo guulaha laga gaaray dajinta dadkii reer guuraaga ahaa ee abaaruhu waxyeelleeyeen. Waxay kaloo soo beeqdeen iskaashatada «Ubax» ee degmada Qoryooley, halkaasoo ay u kuur galeen Iskaashatooyinka dalka JDS qaabka ay u dhismayaan iyo guulaha laga gaaray.

Wafdigaas saaxiibbada ahi meeshii ay tagaanba waxaa si Jaallenimo ah ugu soo dhoweynaayey madaxda Xisbiga iyo dadweynaha halkaas ku nool; waxaana laga siinaayey warbixin buuxda oo la xariirta hawlaha iyo isbeddelka kacaaneed ee halkaas ka socda.

Sida la ogyahay, Xisbiga Shuuciga ah ee dalka Talyaaniga iyo Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed waxaa ka dhaxaysa saaxiibnimo qoto dheer oo ku dhisan iskaashi iyo isbahaysi Jaallenimo.

# 7da Maajo Maalinta qaramaynta

7da Maajo waxay ka mid tahay maalmaha xusuusta gaarka ah u leh xoogsatada Soomaaliyeed. Maalintaasi taariikhda Soomaaliyada Kacaanka ah waxay gashay Sannadkii 1970kii, markaasoo Kacaanku geesinnimo u yeeshay in la qarameeyo Bankiyadii iyo Shirkadihii ay Shisheeyuhu maamulan jireen, kuna dhiigmiiran jireen Shaqaalaha Soomaaliyeed.

Sida la ogyahay qaramaynta Halbawlayaasha dhaqaaluhu waxay ka mid tahay mabaadii'da Hantiwadaagga Cilmiga ah ee ka soo horjeedda isku dulnoolaadka iyo dhiigmiiradka. Dunida Hantiwadaagga ah waxaa jira 2 (Laba) nooc oo lahaansho ama hanti dadweyne oo dawladdu maamusho iyo hanti iskaashato oo ay maamusho xoogsato muruqmaal ah oo awooddooda wax soo saarka meel isugu geysatay.

Haddaba qaramayntii halbowlayaasha dhaqaalaha dalkeenna waxay tilmaan cad ka bixinaysay astaanta horusocodnimada ee Hantiwadaagga ku abtirsata ee uu lahaa Kacaanka 21kii Oktoobar ilaa iyo dhalashadiisii horeba. Kacaanku wuxuu u dhashay daryeelka danaha xoogsatada iyo guud ahaan dadweynaha Soomaaliyeed, jidka ugu habboon ee himiladaas lagu gaari karana wuxuu u arkay inuu yahay hantiwadaagga Cilmiga ah.

Sida awgeed ayay tallaabooyinkii ugu horreeyey ee Kacaanku waxay ahaayeen kuwo ka shidaal qaadanaya dhuuxa mabaadii'da Hantiwadaagga Cilmiga ah. Tallaabooyinkii ugu horreeyey uguna muhiimsanaa ee noocaas ahaana waxa ka mid ahaa kiwii qaramaynta.

Sida la ogyahay dal kasta noloshiisa iyo horumarkiisa waxay ku xiran yihiin wax soo saarka maaddiga ah ama haddii si sahlan loo yiraahdo dhaqaalihiisa. Dhaqaalaha maamulkiisuna mar hadduu gacanta ugu jiro dad maalqabeen ah oo aan innaba dan ka lahayn daryeelka dadweynaha iyo horumarinta Bulshada, balse ilaha dhaqaalaha dalka u adeegsanaya sidii ay iyagu ribix gaar ahaaneed oo dheeraad ah ku heli lahaayeen, suurtagal ma noqon karto dalkaasi inuu gaaro horumar caddaalad ku dhisan, oo wax-kuool u ah xoogsatada dhalinaysa dhaqaalahaas isaga ah.

Kacaanka Oktoobar aragtidaas kacaaneed ee cilmiga ah ayuu ka duulayey, markii uu ku dhaqaaqayey qarameynta ilaha dhaqaalaha dalka. Muddadii 8da Sano ahayd ee maamulka ilaha wax soo saarka dalku uu ku jiray Gacanta xoogsatada Soomaaliyeed, isbeddelka dhabta ah ee ku dhacay warshadaha, Bankiyada iyo Wakaaladaha, dalka wuxuu muujinayaa farqiga weyn ee u dhexeeya dhaqaalaha lagu maamulo habka hantigoosiga iyo midka ku jahaysan qaabka hantiwadaagga; iyo sida kan dambe ugu danaynayo xoogsatada iyo guud ahaan Bulshaweynta.

# Damaashaadkii dhallinyarada ee 15ka Maajo

15ka Maajo waa maalinta dhallinyarada Soomaaliyeed, maalintii la unkay ururkii dhallinta Soomaaliyeed ee gobannimadoonka ahaa, sannadkii 1943kii. Muddadii Kacaanku jiray sannad walba munaasabaddaas waxaa loo sameyn jiray dabbaaldeg lagu xusuusanaayo halganka dhallinyarada, 15kii Maajo ee sannadkii dhowaa 1977kii waxaa rasmi ahaan loo dhisay Ururka Dhallinyarada Kacaanka Soomaaliyeed. Sidaa awgeed shan iyo tobanka Maajo ee sannadkaan waxaa loo sameeyey dabbaaldeg ballaaran oo lagu xusayey labadaa munaasabadood oo isku soo beegmay, dhalashadii fikraddii gobannimadoonka iyo sannadguuradii 1aad ee dhismaha U.DH.K.S. U.DH.K.S. damaashaadyadii uu munaasabaddaas ku xusay waxa ugu waaweynaa kuwa hoos ku qoran:

1. XAFLAD AY QABANQAABISAY DHALLINTA SHAQAYSAA.

Habeennimadii 15ka Maajo Xarunta Dhexe ee UDHKS waxa lagu qabtay Xaflad weyn oo ay soo qabanqaabiyeen Guddiyada dhallinta shaqaysa ee magaala-madaxda iyo Xoghayntooda Guud.

Xafladdaas waxa dhallinyarada kala soo qayb galay Kaaliyaha Xoghayaha Guud ee XHKS, ahna Madaxweyne ku-xigeenka JDS, Jaalle Ismaaciil Cali Abokor iyo madax kale oo ay ka mid ahaayeen Guddoomiyaha Hoggaanka Abaabulka Golaha Dhexe XHKS, Jaalle G. Sare Cabdulqaadir Xaaji Maxamed; Guddoomiyaha Hoggaanka Aydolojiyada Golaha Dhexe XHKS Jaalle Dr. Maxamed Aadan Sheekh; Guddoomiyaha Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed, Jaalle Maxamuud Cali Axmed; Xoghayaha Guddiga Xisbiga Gobolka Banaadir, Jaalle Yuusuf Ibraahim «Abuuraas» iyo Guddoomiye ku-xigeenka 1aad ee Urur




ka Dhallinyarada Kacaanka Soomaaliyeed, Jaalle Daahir Warsame Yuusuf.

Xafladdaa waxa khudbad gaaban oo warbixin iyo soodhoweyn isugu jirtay ku furay Guddoomiye ku-xigeenka 1aad ee UDHKS, Jaalle Daahir Warsame Yuusuf, isagoo ku soo dhoweynayey Kaaliyaha Xoghayaha Guud ee XHKS, Jaalle S./Guuto Ismaaciil Cali Abokor ka dibna Jaalle Ismaaciil wuxuu dhallinyarada halkaa uga soo jeediyey khudbad qaayo leh. Qodobbadii khudbaddiisaa uu ku falanqeeyey waxa ka mid ah:

1. Taariikhda halgankii dhallinyarada Soomaaliyeed iyo maalintii lama ilaawaanka ahayd ee ay ka soo qaateen dareensiinta dadweynaha qiimaha xorriyadda.

2. Cadaadiskii iyo daryeel la'aantii dhallinyaradu kala kulantay xukuumadihii dibusocodka ahaa ee kacaanka ka horreeyey.

3. Tallaabooyinkii cadcaddaa ee kacaanku ka qaaday daryeelka dhallinyarada, isagoo u jeexay dhabba cad oo ay u maraan gudashada xilkooda taariikhiga ah.

4. Firfircoonidii kacaannimo ee dhallinyaradu muujisay muddadii kacaanku jiray iyo guulihii badnaa ee ay soo hoysay.

5. Ugu dambeystii Jaalle Ismaaciil wuxuu dhallinyarada shaqaysa ku guubaabiyey in ay kordhiyaan dadaalkooda la xiriira ka qayb galka hawlaha bulshada lagu horumarinayo siiba marxaladdaan adag ee maanta lagu jiro.

Dhallinyarada shaqaysa waxay xafladdaas ku soo bandhigtay ciyaaro, muusiko iyo heeso waddani ah oo aad u raalli geliyey dadkii xafladda ka qayb galay.

**2. KAALINTII DEGMOOYINKA**

Habeennimadii 14ka Maajo, Golayaasha Hannuuninta ee 14ka degmo ee gobolka Banaadir iyo guud ahaanba degmooyinka dalka waxa lagu qabtay xaflad lagu soo dhaweynayey maalitaa xusuusta mudan. Xafladahaa waxa qabanqaabiyey guddiyada UDHKS ee degmooyinka, iyagoo kaashanayey guddiyada Xisbiga iyo Ururrada kale ee bulshada.

Xafladahaa waxa ka qayb galay, khudbadana ka jeediyey madaxda Xisbiga. 14ka degmo gobolka Banaadir xafladihii lagu qabtay waxa ka qayb galay xildhibaanno ka tirsan Golaha Dhexe XHKS. Xafladihii Gobollada lagu qabtayna waxa ka galay kormeerayaasha Golaha Dhexe ee Gobollada iyo Degmooyinka iyo Xoghayayaasha Guddiyada Xisbiga.

Madaxda Xisbigu waxay munaasabaddaa dadweynaha ugu sharxeen taariikhda halganka dhallinyarada Soomaaliyeed heerarkeeda kala geddisan; iyaga oo isla markaana dhallinyarada ku boorrinayey in ay sii kordhiyaan kaalinta ay ka qaadanayaan dhismaha bulshada.

Dhammaan dadweynaha Sooliyeed wuxuu habeenkaas dhallniyarada la qaybsaday farxaddii xuska maalintooda, iyadoo lagu soo jeeday ciyaaro iyo damaashad soconayey ilaa iyo saqdii dhexe, taasoo magaalooyinka iyo tuulooyinkaba habeenkaa ku kordhisay dhaqdhaqaaq farxadeed oo dheeraad ah iyo nolol Cusub.

**3. UBAX LA DHIGAY TAALLOOYINKA XUSUUSTA LEH**

Subaxnimadii 15ka Maajo taallooyinka xusuusta leh ee ku yaal magaalada Xamar, sida: taallada Sayid Maxamed Cabdulle Xasan, Dhagaxtuur, Xaawo Taako iyo Daljirka Dahsoon, ayaa waxa xirmooyin ubax ah dhigay cutubyo ka tirsan qaybaha Ururka Dhallinyarada Kacaanka Soomaaliyeed, kuwaasoo ay ka mid yihiin: Ardada, Dhallinta shaqaysa, Ubaxa Kacaanka iyo dhallinyarada gurmadka ah ee degmooyinka. Waxa kaloo dhallinyarada ubax-dhigiddaas garab ku siinayey, kalana qayb galay kooxo ka socday Ciidammada Qalabka Sida, Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed, Urarka Dimoqoraadiga Haweenka Soomaaliyeed iyo degmooyinka gobolka Benaadir.

Kooxdaasi intii ay ubaxaas dhigayeen, socodkana ku maraayeen waddada Jamaal Cabdi-Nassir oo ay tallooyinka badankoodu ku yaalliin waxa horkacaayey Xoghayaha Guddiga Xisbiga Gobolka Banaadir. Jaalle Yuusuf Ibraahim Abuuraas, guddoomiye ku-xigeenka Hoggaanka Arrimaha Dibedda ee Golaha Dhexe Xisbiga HKS Jaalle Warsame Cali Faarax, guddoomiyaha Ururka Dimoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed, Jaalle Faadumo Cumar Xaashi, Guddoomiye-ku-xigeenka 1aad ee UDHKS, Jaalle Daahir Warsame Yuusuf iyo Jaallayaal ka mid ah 13kii dhallinyarada ahaa ee aasaasay Ururkii gobannimadoonka ahaa ee (SYL) kuwaasoo intooda nool had iyo jeer xushma ahaan loogu marti qaado xuska munaasabaddaas.

4. BANNAANBAXYO LIXAAD LEH.

Maalintii 15ka Maajo gelinkeedii dambe dhallinyarada dalka Jamhuuriyadda Dimuqraaddiga Soomaaliya waxay samaysay bannaanbaxyo ballaaran oo uu hoggaaminaayey UDHKS.

Dhallinyaro tiradoodu 100.000 kor u dhaaftay ayaa socod ku maray waddooyinka waaweyn ee magaala-madaxda Muqdisho. Dugsiyada iyo Jamaacadaha, dhallinyarada degmooyinka, Ubaxa Kacaanka, dhallinta shaqaysa iyo kooxaha isboortiga. Waxa kaloo bannaanbaxaas dhallinyarada taageero ahaan ugala qayb galay kooxo ka tirsan Xiriirka Guud ee USHS, Ururka Dimoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed, Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed, iyo Ciidammada Qàlabka Sida.

5. BANDHIG RIWAAYADEED.

Isla habeennimadii 15ka Maajo, Golaha Murtida iyo Madadaalada waxa lagu qabtay Xaflad ballaaran oo la xiriirtey barnaamijkii xuska maalintaa qaayaha leh. Xafladda oo uu soo qabanqaabiyey UDHKS waxa lagu daawaday googoos isugu jiray murti, maadays, muusik iyo heeso waddani ah, waxana wada jir u soo bandhigay kooxda fanka ee UDHKS ee la yiraahdo DANAN iyo Ubaxa kacaanka Oktoobar, waxa kaloo qayb wanaagsan ka qaatay kooxda «Jiibka Qaranka» la magac baxday ee gabdhaha dhallinta kacaanka ee Afgooye.

Googooskaas waxa ku dheehnayd murti waddani ah oo aad u qiime badan, kana warramaysey taariikhda Ummadda Soomaaliyeed iyo halgankeeda xaqa ah.

Dhallinyarada waxaa sharaf u noqotay inuu barnaamijkaa kala soo qayb galay Xoghayaha Guud ee XHKS, Madaxweynaha JDS, Jaalle Maxamed Siyaad Barre oo halkaas ka soo jeediyey khudbad qiimo iyo qaayo leh. Xoghayaha Guud ka hor, waxa halkaas khudbad warbixin iyo soo dhoweyn isugu jira ka jeediyey Jaalle Daahir Warsame Yuusuf, sii-hayaha Guddoomiyaha UDHKS, ahna guddoomiye ku xigeenka 1aad ee Ururka; kadibna wuxuu magaca ururka Jaalle Siyaad ku guddoonsiiyey hadiyad ah loox ay ku sawiran yihiin astaanta ururka iyo halku dheggiisa oo si qurux badan loogu farayaraystay.

Waxaa kaloo munaasabaddaa laga soo jeediyey baaq UDHKS ku ballanqaadayey inuu sii xoojin doono halgankiisa iyo dagaalkii uu ugu jiray ka dhabaynta halku-dheggiisa ah: Tacab, Tacliin iyo Difaaca mirama Kacaanka. Baaqaa uu akhriyey Xoghayaha Aydolojiyada iyo Brobogaandada ee UDHKS, Jaalle Cabdi Yuusuf Riyaale, wuxuu ahaa mid muujiyey bartilmaameedka halganka dhallinyarada Soomaaliyeed.


6 XAFLAD CAWEYS AH.

Xafladihii isdaba joogga ahaa ee ururka dhallinyarada Kacaanka Soomaaliyeed ku maamuusayey sanadguuradiisa 1aad iyo maalinta taariikhiga ah ee 15ka Maajo, waxaa ka mid ahayd Xaflad habeenkii bishu 17 ka ahayd lagu qabtay Hoteelka Afrika ee ku dhexyaal Xaafadda Afrika. Xafladdaasi waxay ahayd xaflad dhallinyaro oo aan rasmiyad badan lahayn ee Muusika iyo Ciyaar furan isku ahayd. Waxaana loogu tala galay in ay ku nastaan Jaallayaashii ka soo qayb galay, muddo dhowr beri ahna ku soo dhex-jirey hawlihii dabbaaldegga.

Jaallayaashii xafladdaa ka soo qayb galay waxa ka mid ahaa Xildhibaanna ka tirsan Golaha Dhexe XHKS, ee Guddoomiyeyaal ka ah hoggaamada Xisbiga iyo Ururrada Bulshada iyo qaybaha kala geddisan ee dhallinyarada.

Ubaxa Kacaanka Degmada Waaberi, oo lagu tiriyo kooxda ugu firfircoon ubaxa Gobolka Banaadir xagga fanka, ayaa qayb libaax ka qaatay xafladaa, soona bandhigay heeso waddani ah.

# Sannadguuradii 3aad ee Machadka culuunta Siyaasadda



Habeenimadii 27kii bishii Maajo, golaha masraxa ee dugsiga Xalane waxaa lagu qabtay xaflad lagu xusaayey sannadguuradii 3aad ee ka soo wareegatay asaasiddii Machadka Culuunta Siyaasadda ee G/Dhexe XHKS.

Xafladdaa waxaa ka soo qayb galay Madaxweyne Ku xigeenka JDS ahna Kaaliyaha Xoghayaha Guud ee XHKS Jaalle S/ Guuto Ismaaciil Cali Abokar, Taliyaha Dugsiga Xalane Jaalle S/ Guuto Aadan Cabdullaahi Nuur, Howlwadeenno ka socday Xisbiga iyo ururrada bulshada, macallimiinta Jaamacadda Ummadda iyo dhammaan barayaasha, madaxda iyo ardada dugsiga tababarka Xalane.

Munaasabaddaas waxaa khudbad ka jeediyey Kaaliyaha Xoghayaha Guud ee XHKS Jaalle Ismaaciil Cali Abokar, oo ka warramay baahidii keentay in la asaaso Machadka Culuunta Siyaasadda iyo ujeeddooyinkii laga lahaa, kuwaasoo uu tilmaamay in ay ugu weynayd sidii loo heli lahaa kaadar aqoon u leh maabaadi'da hantiwadaagga iyo hoggaaminta bulshada, taasoo lagaga kabsan karo baahidii waxbarashada Siyaasadeeda ee dibadda taasoo la ogyahay aqoonta baraha ajnabiga ahi in aysan sida la doonaayo uga tarjumi karin baahida dalkeenna.

Kaaliyaha Xoghayaha Guud wuxuu kaloo ka hadlay marxaladda adag ee maanta dalku maraayo iyo sida ummaddu ugu tabaabushaysatay ka gudbidda marxaladdaas.

Ugu dambayntii, Madaxweyne Ku xigeenku wuxuu ardada Machadka ku boorriyey in ay kordhiyaan dadaalkooda, si ay u noqdaan kuwa ka bixi kara kaalinta ay ka sugayso ummaddoodu.

Madaxweyne Ku xigeenka ka hor waxaa hadal warbixin iyo soo dhaweyn isugu jiray halkaas ka jeediyey maamulaha Machadka Culuunta Siyaasadda Jaalle S/ Guuto Aadan Cabdullaahi Nuur kana tirsan Golaha Dhexe XHKS, Jaalle Aadan wuxuu ka warbixiyey marxaladihii kala duwanaa ee uu soo maray iyo horu marka uu gaaray Machadku.

Sida la ogyahay Machadka Culuunta Siyaasadda waxaa la furay 25kii Maajo, sannadkii 1975kii, muddadii saddexda sano ahayd ee uu furnaana waxaa ka soo baxay Jaallayaal fara badan oo maanta howlwadeen ka ah Hay'adaha Xisbiga iyo ururrada Bulshada.

# Xil–xisbiyeed lala kala wareegay

Bisha 18 keedii waxaa xilkii Xoghayannimada Guddiga X.H.K.S. ee gobolka Banaadir lagu wareejiyey Jaalle Warsame Cali Faarax oo ka tirsan Golaha Dhexe ee XHKS. Xilkaas oo uu hore u hayey Jaalle Yuusuf Ibraahim Cali «Abuuraas» oo isaguna ka tirsan Golaha Dhexe XHKS. ahna duqa magaalada **Muqdisho.**

Munaasibaddii xilkaas lagula kala wareegayey oo lagu qabtay xarunta Guddiga Xisbiga Gobolka Banaadir, waxaa ka soo qayb galay Guddoomiyaha Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed Jaalle Maxamuud Cali Axmed oo ka tirsan Golaha Dhexe XHKS. iyo Xubnaha Guddiga Xisbiga Gobolka Banaadir.

Xoghayihii hore ee Guddiga xisbiga Gobolka Banaadir Jaalle Yuusuf Ibraahim Cali «Abuuraas» oo halkaas hadal ka jeediyey wuxuu ka warramay hawlihii uu soo qabtay Guddigu,



muddadii uu isagu hayey xilka Xoghayannimada Gobolka Banaadir, taasoo isla markaasna ah muddadii uu dhisnaa Guddiga Xisbiga Gobolku.

Xoghayaha Cusub Jaalle Warsame Cali Faarax, oo isaguna munaasibaddaas hadal gaaban ka jeediyey, wuxuu ka codsaday xubnaha Guddiga Xisbiga iyo hawlwadeennadiisa in ay gacan ku siiyaan gudashada hawlihiisa , si loo meel mariyo gudashada waajibaadka ballaaran ee Xisbigu u hayo Ummadda Soomaaliyeed.

# Dhaqdhaqaaqa Degmooyinka

1— DEGMADA X. JAJAB

8dii bisha Xoghayaha Xisbiga Degmada X/Jabjab Jaalle Abshir Sheekh Xasan wuxuu tababar u xiray 114 qof oo ka mid ah Xubnaha cusub ee ku soo biiray XHKS ee Degmadaas.

Tababarkaas oo soconayey muddo 15 beri ah, Jaallayaasha cusubi waxay ku dar sayeen banraamijka iyo Xeerka Xisbiga, faa'iidadii laga filaayeyna waa laga gaaray.

Tbabbarkaas waxaa ka horreeyey mid kale oo 20 beri u socday Guddiyada Uungyada Xisbiga ee Xaafadaha ay ka kooban tahay degmada X/Jabjab. Tababarkaasi wuxuu ahaa mid guddiyadaas looga dhaadhicinaayey Dokumentiga Xisbiga, xilka unugyada iyo xeerka iyo Barnaamijka Xisbiga oo mar kale laga baaraandegaayey.

Isla degmada X/Jabjab, habeenkii bishu (Maajo) ahayd 13ka waxaa lagu qabtay gabagabadii tartankii fanka ee muddaba ka dhexsocday degmooyinka gobol ka Banaadir, iyadoo lagu beegaayey munaasabadda xuska 15ka Maajo, maalinta dhallinyarada Soomaaliyeed. Tartankaas oo habeenkaas dhex maray degmooyinka X/Jabjab iyo Shangaani, guushii kama damaysta ahaydna waxay raacday deg mada X/jabjab. Tartanka dhinaciisii kale wuxuu isla habeenkaas degmada Hodan ku dhexmaray Hodan iyo Yaaqshiid, guushiina waxay raacday degmada Hodan.

Tartankaas oo ahaa mid waxtar u leh dhiirrigelinta fannaaniinta iyo kicinta dad weynaha, degmooyinkii ku guuleystay waxaa abaalmarin loo siiyay qalabka fanka waxaana abaalmariyey ururka dhallinyarada kacaanka Soomaaliyeed; taasina marka dhinac kale laga eego, waa tallaabo wax weyn ka taraysa wadashaqeynta degmooyinka iyo ururrada bulshada.

2. DEGMADA WAABERI

6dii bisha Maajo Golaha Hannuuninta Degmada Waaberi waxaa lagu xiray tabbar muddo labaatan beri ah u soconaayey dhallinyarada gurmadka ah ee degmadaasi. Waqtigaas ka hor dhallinyaradaasi waxay u kala qaybsanaayeen xaaafdaha, hase yeeshee, waxaa dan la biday in Ciidankaas loo dhiso heer degmo, Xaafaduhuna ay abaabushaan Brigaato cusub.

Tababarka dhallinyaradaas oo la xariirey tallaabadaas cusub, loogana dhaadhicinaayey wajibaadkooda iyo Xeerka Ururka, waxaa xiray Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmadaas Jaalle Maxamuud Sh. Cabdisamad.

3. DEG. SHANGAANI

Golaha Hannuuninta dadweynaha degmada Shanggaani waxaa lagu qabtay barnaamji «Kadis» ah oo lagu tartansiinaayey ardada dhi gata dugsiyada degmada ku yaal.

Barnaamijkaas oo socday 17-25kii bisha Maajo, ujeeddooyinkii laga lahaa waxaa ka mid ahaa in ardada lagu soo xiro degmada iyo in lagu dhiirrigeliyo in ay aqoontooda kororsadaan.

Waxaa kaloo dugsiyada degmadaas iyo Xaafadaheedaba lagu tartansiiyey xagga Suugaanta. Tartankaas oo socday 1-23kii bisha, waxaa Golaha Hanuuninta degmada lagu soo gabagabeeyey 24kii bisha, halkaa soo lagu qabtay Xaflad lagu dhiirrigalinaayo Jaallayaashii ka qayb galay, laguna abaalmariyey Xaafadihii iyo Dugsiyadii ku guulaystay.

## ARRIMAHA DUNIDA



# DAWLADAHA DHEXDHEXAADKA IYO MAWQIFKA KUUBA

Haddii dunida waa nabad lagu wada daaqi jirey, gumeysi ayaa yimid. Waxaa dadyow badan qarniyaal la gumeystaba, dadkii la addoonsanayey hadba qaar halgan gobannimadoon u qalab qaate siyaasi ahaanna in badan ayaa xorowday, gumeysigii dhaqaale se weli waa halkiisii. Gaashaanbuurtii reer galbeed ee adduunka ka talinaysey waxa ka barbar dhshay qaab siyaaasdeed oo kale, kana tisqaaday dalkaa Midowga Soofiyeeti.

Dhammaadkii dagaalkii dunida ee 2aad ba waxa kharriidaddii adduunka ka muuqday dalal badan oo Hantiwadaag ah. Intaa kuma ekeyn dhallan gaddoonka dadyowga ku dhacayey hadba qaran cusub ayaa curanayey. Qaab gumeysi oo gaboobay ayaa gabbalkii dhacayey, waxaana halkiisii ka tisqaadayey gumeysi kale gumeysiga cusub, barwaaqada qarammadii cusbaana waa loo soo hanqal taagayey, ayadoo la beddelayo habkii iskudulnoolaanshada, loona rogayo mid cusub.

Dagaalkii dunida ee 2aad markuu dhammaaday dagaalkii qaboobaa wuxuu gaadhay heerkiisii ugu sarreeyey. Dagaalkii qaboobaa wuxuu keeney in adduunka cabsi weyni ka abuuranto. Cabsida waxa dhaliyey heshiisydii iyo ku-han jabaaddii hubka halista ah, kaasoo yeeshay culays siyaasadeed, kolkaa ayaa Dunida laba xoog oo waaweyn ayey u kala baxday, waxa khatar galay jiritaanka beni'aadamka. Waxa walwalka iyo walaacu ku badnaa, dalalkii markaa gumeysiga ka xorooobay ee u baahnaa horumar dhaqaale si ay ku sameeyaan degganaansho iyo nabad lagu wada noolaado. Muruggii xaaladda siyaasadeed ee adduunka waxa ka soo dhex baxay ama ka dhex dhashay urur caalamiya oo cusub. Ururkaa cusubi wuu sii ballaadhanayey, tamar iyo laxaadna waqtiba waqtiga ka dambeeya wu sii taransanayey. Ururka cusub waxa loogu wanqalay magacyo door ah oo siyaasad iyo dhaqaalaha ku lug leh: dawladaha dhexdhexaadka ah dunida saddexaad, dunida sabolka ah, kooxda 77ka ah iyo dunida Koonfureed.

Waxyaabo badan ayaa qarammadaa kulmiyey gobannimadii ay dhawaan hantiyeen waxay wada doonayeen inay dabarkii gumeysiga jaraan, waxay wadaageen dano iyo ujeeddooyin, dhismahooda: dhaqan, dahaale iyo siyaasadeed ba wuu isu dhawaa. Dalalkaasi waxay qaateen siyaasad dhexdhexaad ah, taasoo ay u ahayd sabab duruuftii iyo xidhiidhaddii dunida waagaa ka jirey.

Himilooyinkaa dawladaha dhexdhexaadka ahi waxay ka dareeraan cadaadiska siyaasadeed iyo ka dhaqaale ee dalalka hore u maray iyo wada dhaqankay wadaageen dalalka hodanka ah: Hantigoosi iyo Hantiwadaagba. Waa marag ma doonto maanta in dalalka dhexdhexaadka ahi u dagaallamayaan: dimoqraadiyad, madaxbannaani siyaasadeed iyo mid dhaqaaleba. Shirweynayaasha iyo go'aannada kulannada dalalka dhexdhexaadka ah ka soo baxa waxaynnu ka soo dheegan karnaa ujeeddooyinka soo socda:

1. In la dammaanad qaado wada noolaansho nabadeed kaasoo ah sida kaliya ee lagu gaari karo horumar dhaqaale.

2. In la adkeeyo qarannimada iyo madaxbannaanida dalalka dunida saddexaad, isla markaana laga hortago lana tirtiro wixii manjaxaabin siyaasadeed, dhaqaale ama dhaqan ba jirta.

3. In dagaal lala galo dibudhaca, lana gaadho horumar dhaqaale iyo mid siyaasadeedba iyadoo isla markaa la soo gaabinayo kala fogaanshaha dunida saddexaad iyo dalalka hore u maray.

4. In loo hawl galo xidhiidh dimoqraadiya oo dunida dhex mara iyadoo dalalka dhexdhexaadka ahi kaalin wacan kaga jiraan wada noolaanshaha dalalka duinda.

Shirkii Belgrade ee 1962kii ayaa ku baaqay in dalalka dhexdhexaadka ahi la dagaallamaan: Imberyaaliyadda, gumeysiga, gumeysiga cusub, midabtakoorka iyo Sahyuuniyadda Imberiyaaliyaddu qaab ay tahayba dunida ha ka dha-

mmaato ayuu ahaa baaqa dalalka dhexdhexaadka ahi.

Fikradda dhexdhexaadka ahi waxay ku soo baxday mar ay madaxda dunida saddexaad qayb ka mid ah ku kulmeen magaalada Baanduung oo Indoniisiya ku taal 1955kii ayaa halkaas dhidibba loogu aasay Ururka dalalka dhexdhexaadka ah. Kulankii 2aad waxa lagu qabtay magaalada Belgrade, xarunta dalkaa Yugoslaafiya 1962kii. Shirka waxaa lagu guddoonsaday xaqa ay Ummaduhu u leeyihiin inay dheefsadaan barwaaqadooda iyo in la isu soo dhaweeyo kala fogaanshaha dhaqaale ee dalalka adduunyada.

Halyeeyadii ururkaa dawladaha dhexdhexaadka dhismihiisa sida firfircoon uga qaybqaatay waxa ka mid ahaa curadadii Afrika iyo Aasiya: K. Nkruuma, Jamaal Cabdinaasir, Nehru Sukaarno iyo madaxweynaha dalkaa Yogoslaafiya, Marshaal Tito. Shuruudaha lagaga mid noqonayo ururkaa waxa lagu dejiyey Qaahira Juunyo 5dii ilaa 12dii 1961kii shir loogu diyaargaroobayey kulankii Belgrade ee 1961kii, tan iyo shirkii Kolombo ee 1976kii, shuruudahaasi weli way taagnaayeen; kuwaasoo ahaa:

1. Dalkaasi waa inuu ku dhaqmaa siyaasad madaxbannaan oo ku qotonta nabad ku wada noolaashaha dalalka leh qaabab Siyaasadeed oo kala duwan iyo dhexdhexaadnimada ama waa inuu raacaa siyaasad dhaqanka oggol.

2. Dalkaasi waa inuu taageeraa dhaqdhaqaaqyada gobannimadoonka ah.

3. Dalkaasi waa inuu ka mid noqon isbahaysi ballaadhan oo ciidameed, kaasoo loo samaystay xiisadaha dhex mara xoogagga waaweyn.

Dalalka dhexdhexaadka ahi sannad walba way sii kordhayeen sida ka muuqata shaxda hoose, tiradooda khordeysay waxay sii xoojisay codkii ay ku lahaayeen Qarammada Midoobay iyo shirarka caalamiga ah.

| SHIRKII | Baanduung 1955 | Belgrade 1961 | Qaahira 1964 | Lusaka 1970 | Aljeris 1973 | Colombo 1976 |
|---|---|---|---|---|---|---|
| Dalalka ka soo qaybqalay | 23 | 25 | 49 | 54 | 76 | 85 |

Dhaqdhaqaaqii iyo daggaakii siyaasadeed ee dalalka dhexdhexaadka ahi wax weyn ayuu ka beddelay qaabka siyaasadeed ee dunida, kaasoo hore adduunka laba ugu qaybiyey: Koox gumeysata iyo dadadweyne bada oo la gumaysto. Guushaas siyaasadeed ee dalalka dhexdhexaadku gaadheen waxay ina dareensiinaysaa baahida loo qabo qaab dhaqaale oo cusub, kol haddii qaabka dhaqaale ee jiraa ka dareero qaabkii siyaasadeed ee dumay kaasoo ku qitomay sabool iyo hodan dhiigmiirta. Qaabka dhaqaale ee dunida maanta ka jira waa in lagu dooriyaa mid cusub oo dammaanand qaadaya in si xaq ah loo wada qaybsado dheefta dunida, in la wadaago xidhiidh dhaqaale oo isku dheellitiran iyo soo dhowaanta kala fogaanshaha dhaqaale ee dunida. ahab oon sedtheauu alsee om

Iyadoo mabaadi'da dhexdhexaadnimadu sidaa u hufan tahay, dadyowgii qarniyada la soo cadaadinayeyna u baahdeen xornimo dhan walba ah, ayaa waayadan dambe ifafaale cusubi soo baxay. Dalalkii dhexdhexaadka ahaa ee aan quwadaha dunida dhanna raacsnayn ayaa dalka Kuuba dab leh la dhexgalay. Bal aan dib u yar dhuganno taariikhda dalka Kuuba. Wuxuu ahaa dal Ditatoore oo Batiste la oran jiray madax ka ahaa kaasoo ka mid ahaa kuwo Laatiin Ameerika ka talinayay. Cadaadis iyo kadeed xun ayaa dadweynaha Kuuba soo mareen, oo dhaxalsiiyay inay halgan qadhaadh u galaan xornimadooda, 1959kii ayaa xukunkii Batiste xididda loo siibay halkaana laga dhaliyay xukun u baahday cid garab iyo gaashaanba u noqota markiiba. Dawladda Kuuba waxay u qayshatay dalalka dhexdhexaadka ah oo markaa kobcayay, si lixaad lehna taageero waa loo siiyay iyadoo ay khatar gelisay ama ku haysayba dowladda Mareykanka oo ay aad isugu dhow yihiin. Halkaa kuma ekaan ee dowladda Kuuba iyadoo ka faa'iideysatay aqoonsigii iyo taageeradii adduunyada 3aad u fidisay ayay maanta ku balan furtay mabaadi'dii iyo siyaasaddii dhexdhexaadnimo ee halkaa ay ku soo gaadhay. Waxa kale oo ay Kuuba u qaylo dhaansatay dawladda Midowga Soofiyeeti iyo Yurubta Bari. Tartiib tartiib waxay ugu xirantay dhaqaalaha iyo isbahaysiga ciidammada ee Waarso. Dalka Kuuba ma aha dal siyaasaddiisu dhexdhexaad tahay, balse waa dal ka tirsan labada quwadood ee dunida maanta ka jira mid ka ah oo welbia aynu oran karno kaba firfircoon xubnaha kalee ay gaashaanbuurta isku yihiin. Kuuba waxay ku tumatay mabaadii'dii salka u ahayd dhexdhexaadnimada. Waxayna badheedh ula safatay labadii xoog ee waaweynaa ee dhexdhexaadka loo ahaa mid ka mid ah, (Midowga Soofiyeeti). Waxay bilowday inay ka hor timaaddo madaxbannaanida iyo halgannada xornimadoonka ah ee Jabhadaha waddaniga ah, taasoo aan meelna kaga xusneyn barnaamijka dalalka dhexdhexaadka ah. Da-

ciidammada Kuubba iyo intay is-bahaystaanba la galeen Jabhadaha Gobannimadoonka Soomaali-G a l b e e d, A b-bo iyo dagaal gumeedka maanta ay ku xasuuqayaan shacbiga Eritereeyaba waa mid aan cidna mugdi kaga jirin.

Kuubba waxay doonaysaa inay ku beer laxawsato dalalka Afrika iyo dunida 3aad ay la gasho talisyada midabtakoorka ah ee Roodiisiya, Namiibiya iyo Koonfur Afrika, taasise maaha mid qarin karta siyaasaddeeda foosha xun ee qaaradda Afrika ay kula dhaqmayso.

Maxay Kuubba haddaba abaalgud u heshay? waxay Midowga Soofiyeeti ka heshay badbaado milateeri bacdamaa dalka Kuuba aad ugu dhow yahay dalka Mareykanka. Kuubba dano dhaqaale oo badan ayay ku qabtaa oo aynu ka soo qaadan karno Bansiinka oo qiimo aad u jaban lagu siiyo. Sonkorta dalka Kuubba qiimaheedii kor ayaa loo qaaday waxaana ka qaata Yurubta Bari iyo Midowga Soofiyeeti.

# Taariikhdu ma saamixi doonto Kaastaro

— CABDI C. JAAMAC —

Waxa xus mudan Qoraal uu beri hore dhigay Fidal Kastro kuna magacawna «Taariikhda ayaa i saamixi doonta». Qoraalka wuxuu kaga hadlay Kastro Kaalintii uu kaga jiray Kacaankii Kuuba oo uu maantaasi garasho la'aani ku jirto u soo dhexgeliyey Arrimaha Geeska Afrika.

Dowrka ay kuuba ka ciyaarayso Geeska Afrika wuxuu ina xusuusinayaa aqoondarridii ka haysatay Gumaystayaashii Reer Yurub Qaaradda Afrika markii ay habka gumaysiga ku bilaabeen.

Inagoo tixgelinayna arrimaha aan kor ku soo sheegnay, ayaa waxa loo baahanyahay inaan derisno khudbad uu Kastro bishii Abriil 27dii, 1978 , ka jeediye yGegida Kacaanka ee Hafaana, halkaas oo uu ku soo dhowaynayey Mengisti. Guddoomiyaha Taliska Addis Ababa, oo markaa booqasho ku joogay Kuuba.

Marka hore, waxaad moodaa in Khudbadaasi ahayd mid arrimo badan oo xiiso leh taabanaysa ,hase yeeshee uu nuxurkeedu u dhacayey ku xadgudub iyo ka been-sheegid Taariikhaha Ummadaha Afrika iyo Ururradoodaba.

Khudbadaasi waxay xalaalaynaysaa aragtida ah: si aad ujeeddadaada u gaadhid jid walbia kuu bannaan.

Sidaa darteed, Kuuba waxay ka leexatay Mabaadi'da Hantiwadaagga Cilmiga ku dhisa nee aqoonsan Jabhadaha Gobannimadoonka xoog weyn oo la dagaalamaya Gumeysiga, isla markaana iyadoo fulinaysa Siyaasadaha Dowlad xoog leh, waxay la soo safatay Gumeysigii jiray Geeska Afrika.

Arrintaa waxa xaqiijinayso xaaladda dhaqaale ee Kuub aku sugantahay taas oo aan u oggolayn inay ku taageerto Dowladda Mengusto Hub Cas-ri ah iyo Ciidamo midna.

Khudbadda Kastro waxay si cad u muujisay aqoondarri weyn oo ka haysata waayaha u gaarka ah Geeska Afrika waxayna ka soo saartay qof maangaab ah.

Wuxuu dafiray jiritaanka dhaqdhaqaaqyada Gobannimadoonka Somali Galbeed iyo Abbo. Waxaanu dagaalkii hubaysnaa ee ay kula jireen Gumeysiga u aaneeyey Somalia oo uu yidhi «Gardarrada Somalia waxay halis galinysaa jiritaanka Iaktoobiya».

Sidoo kale, wuxuu dafiray Gumeysiga Itoobiya ku hayso dadyowga Somali Galbeed iyo Obbo isagoo ku andacooday «Dhulka Ogaadeeniya (Somali Galbeed) wuxuu boqolaal sano ka mid ahaa Itoobiya». Waxa muuqata in Kastra oo xirfaddiisu tahay Qareen uu si indhala' u daafacayi Gumeysiga Xabishada ee Geeska Afrika.

Su'aashu waxay tahay Taariikhihii dhowaa ee 1882-87 iyo 1948-54 ma loo qaadan karaa kuwo gaboobay?

Waxa kaloo Kastro rumaysanyahay in Colaadda ka aloosan Geeska Afrika ay tahay mid ka dhexeysa Somali ya iyo Itoobiya waxaanu si kasmo xumi ah ugu mitaalay mid ka dhici karta Dalalka Meksiko iyo Maraykanka isagoo yidhi, «Waxa weydiiyey niman Mareykan ah waxa ay Dawladdoodu yeeli lahayd haddii ay soo weerarto Meksiko oo doonaysa inay xoog kula noqoto Gobollada Texas, New Mexico, Arizona, California iyo kuwo kale oo ay Qarnigii hore xoog kaga qaadeen hadana ay ku noolyihiin 10 Milyan oo Meksikaan ahi».

Hadalkaa waxa laga dhuuxi karaa waxyaalaha soo socda:

1) Abbaarta isbarbardhigiddu waa mid jaah habowsan.

(Eeg bogga 28aad)

## WARBIXINTA BISHA

# Jaalle Siyaad oo booqday Masar iyo Sacuudi Areebiya

Madaxweynaha JDS Jaalle Maxamed Siyaad Barre iyo wafdi uu hoggaaminaayey ayaa bishii Maajo 10dii soo gebegebeeyey booqasho afar maalmood ah oo uu ku soo maray dalalka Masar iyo boqortooyada Sacuudi Caraabiya.

Jaalle Siyaad oo Xarunta Madaxtooyada ugu warramayey Weriyayaal; wuxuu sheegay in guud ahaan wadahalladii uu la yeeshay madaxda dalkaas Masaarida Mudane ANWAR SAADAAT ay ahaayeen kuwo ku dhammaaday is-afgarad isku sina u arkaayeen dhammaan amuurihii ay isla soo qaadeen. Madaxweynuhu wuxuu sheegay in wadahalladaasi saameynayeen sii xoojinta xiriirka ka dhexeeya labada dal ee Soomaaliya iyo Masar, Ammuuraha Carabta iyo adduunweynaha.

Wadahadallada waxaa uga qayb galey dhinaca Soomaaliya Madaxweyne Jaalle Siyaad, Wasiirka Arrimaha Madaxtooyada Jaalle Cumar Carte Qaalib iyo G/Sare Cabdiraxmaan Cabdi, iyo Safiirka Soomaaliya u fadhiya Masar. Dhinaca Masaaridana waxaa uga qayb galay Madaxweyne Anwar Saadaat, Madaxweyne ku xigeenka Xusni Mubarak iyo madax kale.

Madaxweynaha JDS Jaalle Maxamed Siyaad Barre, waxaa kale oo uu la kulmay Madaxweynaha dalka Suudaan Mudane Jacfar Numeyri oo isna booqasho ku marayey dalka Masar. Sida laga war qabo Numeyri waa Guddoomiyaha Guddiga loo xilsaaray xallinta khilaafaadka carbeed.

Jaalle Siyaad wuxuu sheegay in socdaalka Madaxweyne Numeyri uu ku maraayo dalalka Carbeed uu yahay mid wax ku ool ah, la filaayana inuu ka soo baxo natiijo wacan, Jaalle Siyaad wuxuu intaa ku daray in qof kasta oo Carbeed aaminsan yahay in awoodda iyo danaha carbeed ku xiran tahay midnimada iyo iskaashiga Ummadaha Carbeed, khilaafaadkooduna dan u yihiin cadowgooda.

Mar wax laga weydiiyey booqashadii uu ku soo maray dalka Boqortooyada Sacuudi Caraabiya, Jaalle Siyaad wuxuu sheegay in muddadii uu joogay dalkaas wadahadallo saameynaya xiriirka labada dal, dhibaatada Geeska Afrika, amuuraha Carabta iyo adduunweynahaba uu la yeeshay madax ka tirsan dalkaas isku aragtina ay ka ahaayeen dhammaan amuurihii ay isla soo qaadeen.



# Seminaar loo furay Hoggaamiyeyaal

Madaxweyne ku-xigeenka JDS, Jaalle Xuseen Kulmiye Afrax ayaa bishii Maajo 7dii uga furay tababar socon doona muddo 45 maalmood ah, Xarunta Ceel Jaalle 354 qof oo isugu jira hoggaamiyeyaal, Sammadoonno iyo Nabaddoonno ka socda Gobollada uu dalku ka kooban yahay.

Furitaanka tababarkaasi waxaa ka soo qayb galay Wasiirka Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Reer Miyiga, Jaalle Jaamac Maxamed Qaalib.

Tababarkaas waxay dadkaasi ku baran doonaan dib-u-habeynta barnaamijka joogteynta ololaha horumarinta reer miyiga, daaweynta dadka iyo xoolaha, farsamada beeraha iyo taakuleynta bulshada.


Jaalle Kulmiye oo khudbad halkaas ka jeediyey wuxuu ka warramay ujeeddada laga leeyahay tababarkaasi taasoo uu sheegay inay ugu weyn tahay isdhex-galka isdhaafsiga fikradaha kala duwan ee dadka ku nool gobollada iyo degmooyinka dalka.

Madaxweyne ku-xigeenka oo ka warramaayey wax qabadka Ummadda Soomaaliyeed wuxuu sheegay in Ummadda Soomaaliyeed ogaatay inay wax qabsan karto haddii ay isugeyso muruqeeda iyo maskaxdeeda, taasna ay marag u tahay hawlihii laga qabtay bacaadcelinta Shalaambood oo haatan lagu dhireeyey dhul gaaraya 42 hektar oo dhan walba ah.

Guusha laga gaaray bacaadcelinta Shalaambood waxay beenisay fikradihii khubarada shisheeye oo sheegayey inaan wax laga qaban karin maadaama aanu dalku lahayn batrool», ayuu yiri Jaalle Kulmiye.

Jaalle Kulmiye oo ka warramaayey marxaladda siyaasadeed ee hadda dalku marayo wuxuu sheegay in dhibaato kasta oo ummadda la soo gudboonaata looga gudbi karo isku duubnaan, wadajir iyo iskaashi.

# Aqoon isweydaarsi Warfidiyeen



Aqoon isweydaarsi uga furmay howlwadeenka Wasaaradda Warfaafinta bishii Maajo 10dii ayaa si rasmi ah uu u xirey Xoghayaha Guud ee XHKS, Madaxweynaha JDS. Jaalle Maxamed Siyaad Barre 22kii isla bishaa.

Tobankii maalmood ee uu socdey aqoon-isweydaarsigu waxaa casharro ka dhiibey Wasirro, Hoggaamiyeyaal ka tirsan Golaha Dhexe iyo wakiillo ka socoda dhaqdhaqaaqyada gobannimadoonka. Casharradaas oo ku saabsanaa awood iyo wax-ku-oolnimada nololeed ee bulshada, waxay ku nuuxnuuxsadeen in suugaanta qoraalka ah iyo tan odhaahda ah, iyo hanuuninta warfidintu ay bartilmameedkaa noqotay abuuridda bulsho iskaga filan dhinac walba.

Jaalle Siyaad oo hadal u jeediyey hawlwadeenkii ka qayb qaatey aqoon-isweydaarsiga wuxuu sheegay in qorayaasha iyo

mu'allifiintu ay lagama maarmaan ku tahay in marka hore ay yeeshaan aqoon iyo shucuur waddaninimo isla marskaasna ay awood u helaan tabta ay waxa ku dareensiinkaraan dadweynaha iyagoo sal uga dhigaya cilmiga. «Qorayaasha iyo mu-allifiinta waa afhayeenka ummadda iyaga ayaana gaarsiiya dadweynaha siyaasadda Kacaanka, dhaqaale waxbarashada iyo bulshannimo intaba» ayuu yidhi, Jaalle Siyaad. Waxaanu intaa ku daray «qora yaasha iyo mu-allifiintu waa in ay siyaasad ahaan iyo maskax ahaan u bislaadaan, oo garaadkooda siyaasiga ah heer sare ahaado, markaa ayey u baahin karaan ummaddooda himilooyinka kacaanka iyo halka ay higsanayso oo ah horumar iyo baraare. Madaxweynuhu wuxuu sheegay in qorayaasha iyo mu-alllifiinta Soomaaliyeed xil ballaaran ka saaran yahay xagga horumarinta ummaddooda iyo sare u qaadidda garaadka iyo kasmada siyaasiga ee bulshada si ay u gaarsiiyaan dunida kale ee hor u martay. Isagoo ka hadlaayey xagga tababarrada hawl wadeennada ummadda Jaalle siyaad wuxuu sheegay in himilada kacaanka ay ka mid tahay in qof walba loo tababaro xirfaddiisa gaar ahaaneed si uu ugu yeesho aqoon iyo awood, taasoo si kordhineysa wax qabadkiisa iyo kartidiisa.

«Mar haddii aynu ognahay in waxa abuuri kara qiimaha qarannimo tahay aqoonta iyo cimliga farsamo, iyadu oo dunidduna tadawur samaynayso maalinba maalinta ka dambeysa ayaa kacaanka siyaasaddiisu ku dhisan tahay in hore loo mariyo lana kordhiyo layliga la siinayo hawlwadeenka ummadda» ayuu yiri Jaalle Siyaad. Madaxweynuhu wuxuu intaa raaciyey in mar haddii loo bogay faa'iidooyinka ay leeyihiin tababarrada iyo aqooni sweydaarsigu ay lagamamaarmaan tahay in loo bilaabo layli heer sare ah oo la xiriira xagga farsamada si loo kobciyo aqoonta farsamo ee uu leeyahay farsamo-yaqaanku.

Madaxweynaha JDS, Jaalle Maxamed Siyaad Barre wuxuu shaqaalaha Wasaaradda Warfaafinta aad ugu ammaanay hawlihii taabbagalka ahaa ee ay soo qabteen sagaalkii sano ee maamulka dalka majaraha uu u hayey kacaanku, wuxuuna sheegay in shaqaaluhu la soo kulmeen duruuf adag, hase yeeshee ay uga gudbeen si geesinnimo, wadajir iyo feejignaan leh.

# Duqa Baqdaad oo yimid Muqdisho



Wafdigii uu hoggaaminaayey Duqa magaalada Baqdaad, Jaalle Ibraahim Maxamed Ismaaciil ayaa bishii Maajo 7dii ka ambabaxay magaalada Muqdisho kadib markii ay u dhammaatay booqashadii 5 ta maalmood ahayd ee uu ku joogay dalka Soomaaliya.

Intii ay wafdigu booqashada ku joogeen dalka waxay ka qayb galeen xaflad lagu qabtay Golaha Hanuuninta degmada Boondheere. Xafladdaas oo ay ka soo qayb galeen Madax ka tirsan Golaha Dhexe ee XHKS. ururrada bulshada, dadweynaha ku dhaqan degmada, waxaa hadal ka jeediyey, Duqa magaalada Muqdisho, Jaalle Yuusuf Ibraahim Abuuras. Jaalle Abuuras wuxuu ka warramay xiriirka ka dhexeeya labada dal, Soomaaliya iyo Ciraaq, kaasoo uu sheegay inuu yahay mid qota dheer leh, maalinba maalinta ka dambeysana sii xoogoobaya.

Duqa magaalada Baqdaad oo isna halkaa hadal ka jeediyey wuxuu si weyn ugu mahadnaqay Dawladda Soomaaliya gaar ahaan Madaxda Gobolka, sidii diirranayd ee loogu soo dhoweeyey dalka isaga iyo wafdigiisa, taasoo uu sheegay inay muujineyso xiriirka walaaltinnimo ee labada dal, Soomaaliya iyo Ciraaq. Wafdigu waxa uu booqdey intii uu dalka joogey Gobolka Jabbada Hoose halkaas oo ay ku soo arkeen mashaariicda Horumarinta Beeraha ee laga hirgeliyey Jamaame iyo Sanguuni.

Mar wareysi lala yeeshay ka hor intuusan ka ambabixin Soomaaliya wuxuu sheegay Duqa magaalada Baqdaad, Jaalle Ibraahim Maxamed Ismaaciil, in hadalladii ay yeesheen isaga iyo Madaxda magaalada Muqdisho ay ku heshiiyeen inay isdhaafsadaan wufuud laba dhinac ah si dhinac waliba dhinaca kale uga soo kororsado waayo-aragnimada u gaarka ah.

Isagoo ka hadlaayey xagga iskaashiga iyo wax-wada qabsiga labada dal wuxuu sheegay in laga gaarey guulo waaweyn taasoo surtogelisay dhismaha warshadda safeynta batroolka iyo mashaariic kale.

# Booqashadiî Guddoomiyaha qeybta Horumarınta Suuqa Dhaqaalaha ee Yurub

Wafdi uu hoggaaminaayo Claude Cheysson oo ah Guddooiyaha Horumarinta ee Suuqa Dhaqaalaha Reer Yurub (E.E.C.) ayaa ku yimid booqasho maalin ah dalka Soomaaliya 24kii bishii Maajo.


Mar wareysi lagula yeeshay Gegida Dayuuradaha wuxuu sheegay in booqashadiisu la xiriirto iskaashiga ka dhexeeya JDS iyo Suuqa dhaqaalaha Reer Yurub.

Mr. Cheysson wuxuu intaa raaciyey in Suuqa dhaqaalaha Reer Yurub uu JDS ka kaalmeeyey dhowr mashruuc tan iyo intii ka dambeysay «Heshiiskii L'ome». Wuxuuna Mr. Cheysson caddeeyey in JDS ay kaalin weyn ka ciyaartay heshiiskii lo'ome.

Guddoomiyaha Horumarinta ee Suuqa dhaqaalaha Reer Yurub wuxuu sheegay in muddada uu joogo Soomaaliya isaga iyo wafdigiisu wadahadallo ku saabsan sii xoojinta xiriirka ka dhexeeya JDS iyo Suuqa, la yeelan doonaan Madaxda Soomaaliya.

Mr. Cheysson, oo ay tahay markii labaad ee uu booqasho ku yimaado Soomaaliya, waxaa dhabbaha Dayuuradaha si diiran ugu soo dhoweeyey Guddoomiyaha Hoggaanka Arrimaha dhaqaalaha ee Golaha Dhexe ee XHKS J/le. Axmed Maxamed Maxamuud, Wasiirka Hawlaha Guud J/le Maxamed Xawaadle Madar, Danjireyaasha Dalalka Ingiriiska iyo Faransiiska u fadhiya Soomaaliya.

Wafdigaa uu hoggaaminayey Mr. Cheysson waxaa xafiiskiisa ku qaabilay Madaxweynaha JDS J/le Maxamed Siyaad Barre. Jaalle Siyaad iyo Mr. Cheysson waxay wadahadallada ay yeesheen ku soo qaadeen iskaashiga



ka dhexeeya JDS iyo Suuqa dhaqaalaha Reer Yurub, sidii hore loogu marin lahaa.

Waxay kaloo wafdigu wada hadallo la yeesheen madax ka tirsan Dawladda, kuwaas oo guul ku dhamaadey. Gebi ahaan waxay isla soo qaadeen Mashaariicda laga hirgeliyey Soomaaliya iyo kuwa la damacsan yahay mustaqbalka ee Suuqa dhaqaalaha Reer Yurub uu gacan ka geysan doono.

JDS iyo Suuqa dhaqaalaha Reer Yurub waxay kala saxeexdeen heshiis ku saabsan tababarka shaqaalaha Dekedda cusub ee Muqdisho iyo qalabka hawsha, oo uu bixin doono suuqaasi.

# Bannaanbax taageero

Isagoo la hadlayey dad ka badan Siddeetan Kun oo qof oo isugu soo baxay fagaaraha Daljirka Dahsoon ee Magaaladan Muqdisho bishii Maajo 26dii, Madaxwene Kuxigeenka J.D.S. Kaaliyaha Xoghayaha Guud ee XHKS Jaalle Ismaaciil Cali Abokor wuxuu yidhi; «Taariikhda ayaa caddeynaysa inayan jirin quwad hakin karta ama cabburin karta Ummad u kacday Xornimadeeda», Wuxuuna intaa ku daray, inkastoo Ciidammada huwanta ah ee Ruushka Kuuba iyo xulafadoodu ku tashadeen inay tirtiraan, Shacbiga Eriteriya, xuquuqdoodana xoog kaga duudsiiyaan, taasi ma aha mid u suurta galaysa, waxayna kala kulmi doonaan guul darro iyo jab.

Dadka bannaanbaxa sameenayey oo isugu jirey Ururrada Shaqaalaha, Dhallinyarada, Haweenka, Ciidammada Qalabka sida iyo dadweynahaba waxay bannaanbaxooda ku muujinayeen Taageerada Halganka Gobannimadoonka Eriteriya, Soomaali Galbeed iyo Abbo, waxayna cambaaraynayeen faragelinta Shisheeyaha ee Ammuuraha Afrika

«Waxaa nasiib darro ah in Ruushka iyo Kuuba oo



shalay Taageeri jiray dhaqdhaqaaqyada Gobannimadoonka ah, maanta ku ballan fureen Shacbiga Eriteriya oo ay doonayaan inay xoog ku muquuniyaan, iyaga oo uga hiilinaya gumeysiga madow ee Xabashida» ayuu yidhi Jaalle Ismaaciil.

Madaxweyne Ku-xigeenku wuxuu sheegay in ballan furka Ruushku uu ku sameeyey Eriteriya uusan ahayn midkii ugu horreeyey, hase yeeshee, ay caado u tahay Ruushka in uu ka baxo heshiisyada iyo ballanqaadyada uu la dhigto Ummadaha Adduunka marka uu ka waayo danihiisa gaar ahaaneed, wuxuuna tusaale ahaan u soo qaatay Soomaaliya, Masar iyo Suudaan.

Kaaliyaha Xoghayaha Guud X.H.K.S. Jaalle S/Guuto Ismaaciil Cali Abokor wuxuu caddeeyey in Siyaasadda JDS ayan ahayn mid Isrogrogta ee ay taagan tahay muwqikeeda cad oo ah Taageerada iyo garabsiinta dhaqdhaqaaqyada Gobannimadoonka Adduunka.

Jaalle Ismaaciil wuxuu sheegay in JDS ay sii wadeyso Siyaasaddaasi ah taageerada Ummadaha u halgamaaya Madaxbannaanidooda, wuxuuna intaa raaciyey in Qaddiyadda Eriteriya ay tahay mid xaq ah, waajibna ay tahay in iyaga iyo dhaqdhaqaaqyada gobannimadoonka Soomaali-Galbeed iyo Abbooba loo oggolaado xuquuqdooda aaya ka talinta ah.

Madaxwyne Ku-xigeenku wuxuu kaloo ka hadlay taariikhda Shacbiga Reer Eriteriya iyo heerarkii uu soo maray halgankoodu, oo soo taxnaa muddo 18 sano ah wuxuuna ku tilmaamey inay yihiin dad geesiyiin ah oo neceb gunnimada.

Waxaa kaloo isna halkaa ka hadley Jaalle Cumar Cabdalle oo ka tirsan Golaha Dhexe ee Jabhadaha Gobannimadoonka Eriteriya oo ka warramay heerka uu marayo halganka Ummadda Eriteriya ugu jirto Madaxbannaanidooda iyo dhibaatooyinka uu ku hayo gumeysiga madow ee Xabashida.

Jaalle Cumar, wuxuu shaaca ka qaadey in Ummadda Eriteriya ay leedahay saaxiib u hiiliya garabna ku siiya qaddiyaddooda, wuxuuna intaa ku daray in dalkooda ay ku xoreyn doonaan Qoriga caaraddiisa, kaasoo uu ku tilmaamay inuu yahay afka keliya ee uu yaqaanno gumeysigu.

# Sannadguuradii 15aad ee J. G. S. Abbo

Habeennimadii 23ka Maajo, Golaha Murtida iyo madadaalada waxaa lagu qabtay xaflad ballaaran oo lagu xusaayey Sannad-guuradii 15aad ee ka soo wareegtay asaasiddii Jabhadda Xoreynta Soomaali Abbo.

Xafladdaas oo ay ka soo qayb galeen xildhibaanno ka tirsan Golaha Dhexe XHKS, Madaxda Jabhadaha Gobannimadoonka Soomaali Galbeed, Eretereya iyo Falastiin, dibloomaasiyiin dalal shisheeye ah u fadhiya magaalada Muqdisho iyo dadweyne fara badan, waxaa ugu horrayntii khudbad dheer ku furay Xoghayaha Guud ee Jabhadda Xoraynta Soomaali Abbo, Jaalle Maxamuud Cali Ruubey. Jaalle Ruubey khudbaddiisaas wuxuu ugu hadlaayey taariikhdii dhulka Soomaali Abbo iyo halgankii dheeraa ee dadweynaha halkaas ku dhaqani ay la soo galeen gumeysiga Xabashida.

Xoghayaha Guud ee J.G.S.A. isagoo ku hadlaayey magaca jabhadda, wuxuu ugu baaqay U.M.A., Jaamacadda Carabta, Qarammada Midoobay iyo Guud ahaan dunida nabadda iyo xorriyadda jecel in ay dadweynaha Soomaaliyeed ee gumeysiga Xabashida ku hoos jira garab ku siiyaan baadigoobka xuquuqdiisa madaxbannaanida iyo aaya-ka-talinta.

Waxaa iyaguna eryo taageero iyo bogaadin ah halkaas ka jeediyey wakiillo ka socdey jabhadaha gobannimadoonka ah ee Soomaali Galbeed iyo Eretereya.

Dadkii Xafladdaas ka soo qayb

galay waxay daawadeen barnaamij gocgoos ah oo isugu jiray heeso, maadeys, ciyaaro iyo gabayo. Barnaamijkaas oo si weyn loogu riyaaqay, waxaa soo bandhigtay koox fannaaniin ah oo ka tirsan jabhadda gobannimadoonka ah ee Soomaa li Abbo, kuwaasoo fankooda ku cabbiraayey cadaadiska iyo dibindaabyada gumeysiga Xabashidu ku hayo dadweynaha Soomaali Abbo iyo sida dadweynahaasi uga dhii dhiyey in waligii la gumeysto.

Intaas ka dib, waxaa halkaas khudbad qiimo leh ka soo jeediyey guddoomiyaha HOG. Aydolojiyada G. Dhexe XHKS Jaalle Maxamed Aadan Sheekh oo ka mid ahaa madaxdii XHKS ee Xafladdaas lagu marti qaaday. Jaalle Maxamed Aadan wuxuu si weyn u falanqeeyey dhibaatooyinkii gumeysigu u geystey guud ahaan dadyowga reer Afrika, gaar ahaana shacbiga Soomaaliyeed. Wuxuuse guddoomiyuhu caddeeyey cidina in aysan ishortaagi karin dadweyne u soo jeestay in ay iska rogaan heeryada gumeysiga; jabka iyo burburka gumeysiguna ay yihiin wax lama huraan ah oo taariikhdu xukuntay.

# Xadgudubka Kuuba ee Mabaadii'da Dhexdhexaadnimo

Dawladda Soomaaliyeed waxay soo jeedisay in Ururka ay leeyihiin dalalka dhexdhexaadka ah laga saaro dawladda Kuuba, iydaoo dawladdaasi u soo jiidi karta dunida dhexdhexaadka ah ceeb iyo khatar, maadaama ay noqotey dabadhilif uu ku shaqeysto dalka Ruushku, sidaas waxaa sheegtay ergada joogtada ah ee JDS u fadhida Qarammada Midoobay.

Warkaas oo ergada Soomaaliyeed gaarsiisay dhammaan, ergooyinka joogtada ah ee dawladaha dhexdhexaadka ah u fadhiya Qarammada Midoobay Maajo 14dii waxay ku tiri, «Waxaa la yaab leh in dalka Kuuba oo ku xadgudbay mabaadii'dii iyo xeerkii dhexdhexaadnimo, isagoo u adeegaya dalka Ruushka, loo oggolaado inuu ka ahaado xubin Ururkaas oo mabaadi'diisu qirayso in dalalka Xubnaha ka ahi aanay u janjeersan labada quwadood ee lixaadka leh midkoodna».

Waxay kaloo ergada Soomaaliyeed sheegtay in xiriirka ay dawladda Kuuba la leedahay dalka Ruushka uu yahay mid Ruushka ku adeegtaan, xag milleterinimo xag dhaqaale iyo noloeedba; waxayna Kuuba oggolaatey in Ciidammadeedu Ruushka u noqdaan qawsaarro lagu adeegto oo loo dirsado meel allaale meeshii uu Ruushku ka doonaayo danihiisa gaar ahaaneed.

«In ka badan 50 kun oo ah Ciidammada Qalabka Sida oo u dhashay dalka Kuuba ayaa maanta jooga qaaradda Afrika, iyagoo hirgelinaaya himilooyinka Ruushka ee uu ku gumaadaayo Jabhadaha gobannimadoonka Soomaali Galbeed, Abbo, Cafar iyo Eriteriya, waxayna kuwaasi u noqon karaan tusaale, sida tooska ah ee Ruush ugu maamulayo danihiisa Ciidammada Kuuba», ayey warkeedii ku tidhi ergada Soomaaliya u fadhida Qarammada Midoobay, waxayna intaa raaciyeen in faragelinta Kuubanka ee amuuraha gaarka u ah Afrika ay u soo jiidday qaaradda oo dhan dhibaato iyo welwel, iyo iyadoo cabburisey dadweynihii u halgamayey ayaaka-talintooda waxayna noqotay ayaan darro in ay gacmahooda ku laayaan calooshooda u shaqeytayaasha Kuuba, dad fara badan oo reer Afrika ah.

Ergada Soomaaliyeed waxay sheegtay in tallaabada Ruushka iyo Kuuba ka wadaan qaaradda Afrika tahay mid soo jiidi karta in qaaradda Afrika la isku hardiyo khatarna gelin karta nabadda adduunweynaha, iyadoo ka soo horjeedda xeerka aasaasiga ah ee ay dhigteen Ururka dawladaha dhexdhexaadka ah sanadkii 1961kii oo lagu gaaray in dhexdhexaad laga noqdo loollan dhex yaalla labada dhinac ee xoogga waaweyn, si lagu sugo nabadgelyada adduunweynaha.

Ergadu waxay intaa ku dartay in mabaadii'da ururka dalalka dhexdhexaadka uu ahaa in la taageero dadyowga u halgamaya madaxbannaanidooda, lalana safto dadka ka soo horjeeda isticmaarka iyo gumeysiga.

Ergada JDS waxay ka digtay in haddii shirka dawladaha dhexdhexaadka lagu qabto magaalada Habana uu baabi'i doono magacii, sharaftii iyo wax ku oolkii uu lahaa ururkaasi, nabadgelyada adduunkuna gacmaha ka bixi doonto iyadoo ururkaasina noqon doono mid ay ku shaqeystaan Ruushka.

# SHIR JARAA'ID

J.D.S waxay canbaarey neysaa fara gelinta qaawan ee Ruushka iyo xulafadiisu ka wadaan Afrika, gaar ahaan Geeska Afrika, taasoo ay hubaal tahay in joogitaanka ciidammadaasi iyo hubka ay ku soo daldalayaan uu halis u yahay nabadda Gobolkaan, Afrika iyo adduunweynahaba» sidaasi waxaa caddeeyey Wasiirka Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha Jaalle Cabdisalaam Sheekh Xuseen.

Jaalle Cabdisalaam Shee-



kh Xuseen oo ka hadlaayey shir Jaraa'id oo lagu qabtay xarunta Wasaaradda wuxuu sheegay in fara gelinta shisheeyaha ee Gobolkaan oo maalinba maalinta ka dambeysa sii ballaaraneysa ay keentay in Ciidammada Kuuba lagu soo daldalo waddan kale oo ka mid ah mandiqaddaan, taasoo la damacsan yahay in lagu duulo dal kale oo xor ah oo ka mid ah Geeska Afrika.

Wasiirku wuxuu sheegay in Xabashida iyo inta taageertaba ay u soo guntadeen in Jamhuuriyadda Jabuuti ay ka abuuraan qas iyo tafarruq, taasoo ay ka mid tahay fara gelinta joogtada ah ee ay ku kala qeybinayaan dadka waddankaasi ku nool.

«Qaskaasi iyo fara gelintaasi ay Xabashida iyo xulafadeedu ka wadaan Jabuuti oo ah dal xora iyo beenta ay ka faafinayaan Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya oo ay ku andacoonayaan in Soomaaliya ay xoog ku qabsaneyso Jabuuti, waxay uga gol-leeyihiin iney qariyaan xaaladda dhabta ah iyo qadiyadda Soomaali Galbeed, Abbo iyo Eriteriya ayuu yiri Wasiirku.

Jaalle Cabdisalaam wuxuu caddeeyey in arrintaasi oo dhan ay ka mid yihiin qorshaha guud ee lagu fulinaayo siyaasadda iyo istaraateejiyada Ruushku uu doonayo inuu ku fidsado Gobolkan kuna ilaaliyo iyadoo aan loo aaba yeelin jiritaanka iyo xuquuqda ummddaha Gobolkaasi .

Isagoo ka hadlaayey hanjabaadda isdaba joogga ah ee maalmahanba ka soo yeerayey Mingistu Jaalle Cabdi salaam wuxuu sheegay in handadaaddaasi ayan aheyn mid ku timid Mingistu taladiisa, ayse tahay fikrad Ruushka iyo xulafadiisa oo ka mid ah qorshaha danahiisa isteraateejiga ah inuu ku muquuniyo marba dal.

Wasiirku wuxuu shirkaa Jaraa'id ka caddeeyey in ma shaakilka ka taagan Geeska Afrika uu leeyahay taariikh dheer, ayna tahay dal iyo dad ay Xabashidu gumeysato, iyadoo garabsatay gumeysigii reer Yurub qarnigii 19aad dabayaaqadiisii qaaradda Afrika.

Jaalle Cabdisalaam Sheekh Xuseen wuxuu sheegay in kaddib markii uu gumeysiga Xabashidu ka dhaga adkaaday qaddiyadaha Ummadaha Soomaali Galbeed, Abbo iyo Eriteriya, una dhaqaaqi waayey waan waan nabad gelyo inuu ugu oggolaado xuquuqdooda ay Ummadahaasi ku kalliftay inay qoriga caaraddiisa ku muquuniyaan oo ay xoreeyaan 95% dhulkooda.

Wasiirku wuxuu carrabka ku dhuftay in tan iyo waagaasi mushkiladda Geeska Afrika ay ahayd mid ka dha xeysa gumeysi iyo dad la gumeysto, hase yeeshee ayuu yiri Wasiirku «Talo waxay faraha ka baxday markii ciidammada shisheeyaha ah ay si bareer ah ula soo safteen gumeysiga, damceenna inay xoog ku muquuniyaan gobannimadoonka Soomaali Galbeed iyo Abbo maantana ay xasuuqayaan Eriteriya».

Wasiirka Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynuhu Jaalle Dr. Cabdisalaam Sheekh Xuseen wuxuu sheegay in JDS ay weligeedba arrintaasi ka taagneyd mowqif cad, kaasoo ah in si walaal tooyo iyo Afrikaannimo ah oo nabadgelyo xaq ku dhisan lagu dhammeeyo khilaafaadkaasi, si loo baajiyo dhiig Afrikaan oo isku daata, loogana hor tago faragelinta shisheeyaha oo aan dan u ahayn dadka Afrikanka ah, loogana gol-leeyahay dan gaar ah oo damaacinnimo ah.

Shirkaa Jaraa'id oo ay ka soo qayb galeen warfidiyeenno iyo Diblomaasiyiin ka kala socday dalalka dibedda wuxuu Wasiirku ka caddeeyey in Taliska Mingistu uu sii kordhiyey durbaankii dagaalka, iyadoo la soo kordhiyey hubkii halista ahaa iyo ciidammadii shisheeyaha ahaa ee Ruushka, Kuuba iyo xulafadiisa, kuwaasoo uu sheegay inay ka marag kacayso xaqiijinayaana walaacii iyo walwalkii JDS muujisay markii ay Huwantaasi soo fara galiyeen arrimaha Geeska Afrika.

Jaalle Cabdisalaam wuxuu sheegay in Mingistu uu caddeeyey in dagaal wada jir ah ay Ruushka, Kuuba, Jarmalka Bari iyo Yemanta Koonfureed ay ku qaadeen dalka Ereteriya, iyadoo ay ujeeddadoodu tahay sidii horeyba u damceen in lagu xasuuqo shacbiga Ereteriya, dhulkii ay xoreeyeenna lagu celiyo gacanta gumeysiga Xabashida.

Wasiirka Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha wuxuu shirkaa Jaraa'id ka caddeeyey in JDS ay mar kale ugu baaqeysa Ururka Midowga Afrika, dawladaha Afrikaanka ah iyo dhammaan dadyowga nabadda jecel inay ka hortagaan mu'aamaraadka uu Ruushku ka wado Geeska Afrika laguna duudsiyayo xuquuqda shucuubta Gobolkaasi, taasoo uu sheegay haddii aan laga gaashaaman inay ku dhammaan doonto in arrimaha adduunka xoog keliya lagu muquuniyo.

Wasiirku wuxuu kaloo caddeeyey in JDS ay mar kale ugu baaqeyso dawladaha dhexdhexaadka ah in Kuuba laga saaro Ururka dhexdhexaadnimada, mar haddii ay ku tumatay mabaa'diid asaasiga ahayd ee Ururkaasi, ayna noqotay aalad ay ku shaqeystaan gaashaan buurta WARSO, kuna fushadaan danahooda isteraateejiga ah.

# Afhayeenno ka warramay xaaladda Eriteriya

Nin u hadlyey Wasaaradda Warfaafinta wuxuu caddeeyey bishii Maajo 13dii in taliska Addis Ababa uu weli wado inuu sii ahaado qalabkii ay ku adeegsanayeen Ciidammada shisheeyaha ee Afrika soo fara gelinaya.

Ninkaasi wuxuu sheegay in waddammada jaarka la ah Taliska Addis Ababa iyo Eriteriya ay dareemayaan culeyska quwadaha shisheeye ee doonaya Addis-Ababa inay ka dhigtaan saldhig ay kaga soo duulaan.

«Dadka Reer Eriteriya waxay halis u yihiin duullaan ay ku soo qaadaan Ruushka Kuuba, Amxaarada iyo dawladaha kale ee ay bahaysteen, taasoo ay ujeeddadeedu tahay in lagu muquuniyo inay isu dhiibaan taliska Mingistu uu madaxda ka yahay», ayuu yidhi afhayeenkaasi.

Duullimaadka xoogagga xaaraanta isku bahaysatay ay ku soo qaadayaan Eriteriya halis uma aha oo qura Ummadda reer Eriteriya, hase yeeshee, wuxuu khatar gelinaya madaxbannaanida, nabadgelyada iyo horumarka waddammada Eriteriya jaarka la ah, ayuu raaciyey afhayeenku.

Ninkaa u hadlaayey Wasaaradda Warfaafinta wuxuu kaloo sheegay in Taliska Addis Ababa uu sii kordhiyey Ciidammada shisheeyaha ah ee jooga Geeska Afrika uu haatan awooddiisii isugu geeyey sidii uu halis u gelin lahaa Madaxbannaanida, midnimada iyo horumarka Jamhuuriyadda Jabuuti.

«Dawladaha Itoobiya jaar ka la ihi iyaga oo ka gilgilanaya fara gelinta bareerka ah iyo tallaabooyinka halista ah ee ay Itoobiya ku hayso, waxay guddoonsadeen in ay si caddaan ah isku hortaagaan tallaabooyinka foosha xun» ayuu warkiisii ku soo gebegabeeyey afhayeenku.

Halganka gobannimadoonka ee Eriteriya waxaa uu soo taxnaa muddo siddeed iyo toban sannadood ah wakhtigaas oo ay dadka reer Eriteriya waaya-aragnimo iyo guulo badan kasoo hooyeen goobaha dagaalka. Ummadda reer Eriteriya waxay aad ugu kalsoon tahay in ay gaadhi doonto xornimadeeda, muddo kasta oo ay ku qaadataba.

«Dagaalka waxashinimada ah ee ay ku soo qaadeen taliska Mingistu iyo Ciidammada huweynta ah oo ay ka mid yihiin Ruushka, Kuuba, Jarmalka Bari, iyo Koonrurta Yamen dalka Eriteriya, ma aha mid hakin kara ujeeddada halganka hubaysan ee ay dadka Eriteriya ugu jiraan midnimadooda», Sidaas waxaa yidhi Mudane Cumar Caddalla oo Xubin ka ah Golaha Dhexe ee Jabhadda Xoreynta Eriteriya, ELF, isagoo ka hadlayey Shir Jaraa'id oo lagu qabtay Xarunta ELF ee Muqdisho 17kii Maajo.

Mudane Cumar, wuxuu sheegay inuu kalsooni badan ku qabo in geesiyiinta Reer Eriteriya ay darsi lama illaawaan ah siindoonaan, xoogagga gumeysiga ee haatan isku soo biirsaday inay baabi'iyaan Ummadda Reer Eriteriya, oo doonaya inay dhulkaa ku fushadaan danahooda istaratiijiga ah.

Madaxa Xafiiska Jabhadda Eriteriya ee Muqdisho oo

(Eeg Bogga 30aad)

# HIDDAHA IYO DHAQANKA

# QIIMAHA ISBADDELKA EREYGU KU LEEYAHAY AF - SOOMAALIGA — XISAAM —

Luqadu hadal ahaan waxa ay ka mid tahay waxyaabaha aasaaska u ah nolosha dadka; waase uu ka maarmi karaa in uu dhuuxo oo kala dhilo waxa ay tahay ama ka samaysan tahay. Waqtiga koritaanka iyo kobcinta Af-Soomaaliga waxa lagama maarmaan ah in la garto lana barto, ammuuraha halbowlaha u ah luqadda, iyadoo la adeegsanayo fikradaha aragtiyeed ee cilmiga afafka; macne, dhisme, iyo dareenba.

Culimada qaarkeed waxa ay qabtaa in ay luqadu tahay midda ugu dhibaatada badan dabciga bulshda, una baahan in si cilmi ah loo dhuuxo eray iyo odhaahba. Go'aanka aqooneed ee kaabaya doorashada fikraddan, waxa uu ka shidaal qaadanayaa habka Af-Sooligu isu beddelo oo ku sal leh heerka erayga, kana duwan habka Af-Ingiriisku isu rog rogo oo ku lug leh heerka weedha.

Haddii aan sii qeexno, garashada dhismaha Af-Ingiriiska waxa fiican in laga maro falanqayntii dhinaca dhismaha weedhaha iyo xidhiidhka ka dhexeeya macnahooda, Af-Soomaaligase waxa habboon in la isku koobo dhismaha erayada iyo isticmaalkooda.

Waxa middaas u daliil ah habka erayadu isaga daba yimaaddaan ayaa xukuma falanqaynta weedha iyo is beddelkeeda. Middaasi waxa ay dhalisay Af-Ingiriiska in ay gundhig u noqdaan weedho tirsan oo sal u ah dhammaan wixii weedho suuragala Af-Ingiriisku yeelan karo. Weedhaha salka ah ee Af-Ingiriiska waxa ka mid ah:-

1— The man ate the meat.

Ma na suuro gasho in weedhan loo beddelo:

2— The meat ate the man;

Waxa is beddelka sidaas ahi waxyeelaynayaa naxwaha weedha, dabeedna macnaheeda. Weedha cusubi waa erayo is dabajooga, oo aan murti lahayn.

A-Soomaaliga weedhihiisa ma xukumo habka ay erayadu isaga dabadhacaan. Eraygu meel kasta waa ka geli karaa weedha, iyada oo aan naxwaheeda iyo murtideeda midna is beddelin. Markaas weedhan:

3— Ninkii wuu cunay hilibkii. Waxay isu beddeli kartaa;

4— Hilibkii wuu cunay ninkii.

5— Wuu cunay ninkii hilibkii IWM.

Weedha saddexaad waxa ay la hab tahay weedha koowaad ee Af-Ingiriiska ah; waxase ay kaga duwan tahay, marka erayada la isku beddelo ayaa weedhaha cusub ee abuurmaa yeeshaan naxwe iyo murti hagaagsan. Isbeddelka habka erayga dhammaantiis waxa laga garan karaa in aan marmarka qaarkood loo baahan is beddel eray oo la xidhiidha is waafajinta erayada isrogo beddelayo. Tusaale ahaan haddii aan fal ka horreeyaha «wuu» ku beddelo «baa» isla weedhaas waxa jiraya is beddel fal ka horreeye, marka ay is beddelaan habka erayadu isaga dabadhacaan, taas oo is waafajinaysa magacyada is-rogo beddelay. «Baa» waxa ay isu beddelaysaa «buu» sida:

6— Ninkii baa cunay hilibkii.

7— Hilibkii buu cunay ninkii.

Tusaalayaasha sare sida ay muujinayaan, waxa cad in aanay khasab ahayn xidhiidhka rugeed ee ay leeyihiin erayada weedhaha Af-Soomaaligu. Aragtida luqeed ee Afkeenna waxa weeye mid salka ku haysa erayada. Mar haddii aanay rugta eraygu fadhiistaa Jogto ahayn, sida Af-Ingiriiska, isticmaalka, macnaha iyo kordhinta salka erayadu waxa ay summadda u yihiin weedhaha Af-Soomaaliga. Haddii aanay sida erayadu isugu xigaan qiimo lahayn, waxa habboon, Af-Soomaaliga marka loo baadhayo cilmi ahaan, in laga maro dhinaca erayga is beddelkiisa iyo sida is beddelkaasi wax ugu kordhinayo dhismaha Afka. Haddii aan fikraddan sii gudagalo, is beddelka erayga Af-Soomaaliga waxa laga raadraaci karaa habka ay isu raacaan erayada weedhu, taas oo soo Ifbixisa macnaha iyo hawsha naxweed ee eraygu ka qabto weedha. Jiritaanka fikraddan waxa lagu garan karaa falka iyo tilmaamaha ayaa ka abuurma salka magaca. Saddexda eray ee isku salka ah kala ahna fal, tilmaame iyo magac waxa ay ku kulmi karaan weedh keli ah, iyada oo eray kastaba qeexayo macnaha uu leeyahay iyo hawsha naxweed ee uu ka hayo weedha. Tusaale ahaan haddii lagu daro lifaaqa «San» magac saleed, waxa abuurmaya tilmaa

maha «wanaagsan» oo ka duwan macne iyo hawl naxweba magaca «wanaag». Weliba marka lifaaqa «I» lagu biiriyo magaca «wanaag» waxa abuurmaya falka «wanaaji». Waxa la isugu gayn karaa weedh saddexda erayba, iyada oo laga hor marinayo fal ka horreeyaha «ku» falka, «wanaaji», magacna laga hor marinayo tilmaamaha. Weedha samaysantay waxa ay u qormaysaa:

8— Wanaag ku wanaaji nin wanaagsan. Oo ah weedh macno ahaan iyo naxwe ahaan-ba suuro gal u ah Af-Soomaaliga.

Waxa kale oo jirta in is beddelka eraygu uu magac u beddelo eray fal ahaa, iyada oo lagu biirinayo falka lifaaqyadani «od», «id» «sha», «mo», IWM. Sida:

| Fal | Magac |
|---|---|
| Soco | socod |
| Tag | tagid |
| Qabo | qabasho |
| Dey | deymo |

Haddii weli-ba la galo heer kale oo is beddel eray ah, waxa la ogaanayaa in magacu yeesho isbeddel eray oo ku salaysan caynka (Gender) iyo tirada (number). Marka laga eego dhinac laboodka iyo dhaddigaanshaha lifaaqa magaca raaca, waxa ka mid ah «ka», «ga» «a», «ta» «da» «sha», IWM. Sida:

| | |
|---|---|
| Wiil | wiilka |
| Diig | diiga |
| Libaax | libaaxa |
| Naag | naagta |
| Bisad | bisadda |
| Hal | hasha |

Kolka la iska taago dhinaca tiradana waxa wadarta magaca ku biira lifaaqyada: «o», «iyo» «oyin» «ayaal», «af», IWM. Sida:

| | |
|---|---|
| Keli | wadar |
| Far | faro |
| Weji | wejiyo |
| Hooyo | hooyooyin |
| Wadne | wadnayaal |
| Af | afaf |

Ilaa hadda waxa aan isku deyayey qeexidda is beddelka eray iyo sida uu u taabto macnaha iyo hawsha naxweed ee erayadaas ula dhaqumaan dhismaha weedheed, tanna waxa laga raadraaci karaa, sida ay xubnaha weedhu isula xidhiidhaan. Arrintan dhinaca laga joogsanayaa waxa uu la mid yahay jidkii aan u marnay arrimihii aan ilaa hadda soo falanqaynay ee ka shidaal qaadanayay is beddelka erayga. Markaas is beddelka, eray weedh ku jira, ku dhacaa waxa uu ku keenaa is beddel xubnaha kale ee weedha, sida:

9— wiilka ayaa taga

10— naagta ayaa tagta

Labada weedhood-ba waxa is waafaqsan laboodka iyo dheddigaanshaha magaca iyo falka, markii la adeegsado lifaaqyo isku hawl naxweed ah. Lifaaqyada «a», iyo «ta» ee ku biiray falka waxa sababay lifaaqyada «ka» iyo «ta» ee kala soocaya laboodka iyo dheddigaanshaha.

Is beddelka ku dhacay erayada labada weedhood waxa weeye lifaaqyada la socda magaca iyo falka weedhaha, laakiin fal ka horreeyaha «ayaa» is-ma beddelo marka uu ku jiro weedhan oo kale. Fal ka horreeyaha «ayaa» ee weedhan ku jiraa, waxa uu ka duwan yahay fal ka horreeyayaasha kale, waxana uu ka koobmaa magaca ka horreeya, isaga oo aan beddelin macnaha weedha, sida:

Marka aanay suurto gal ahayn koobiddas oo kale, fal ka horreeyuhu waxaa ku dhaca isbeddel waafaqsan magaca:

12— wiilku wuu tagaa.

13— naagtu way tagtaa.

Labada weedhoodh waxaa ay si kasta u la mid yihiin kuwii ka horreeyey, laakiin kuwan lifaaqyada ayaa lagu soo koobay fal ka horreeyaha caynka qofka saddexaad. Dhammaan lifaaqyada waxa ay u dooriyeen caynka «-ka»; «-ku»; «-ta», na «-tu»; marka magaca. Marka falka waxa ay u beddeleen «-a», «-aa», «-ta» na «-taa»; sidaas oo kale ayaa «wuu» isugu beddeshay «way» dabeedna ay lifaaqyada weedha oo dhammina mid magac iyo mid fal-ba isugu dooriyeen is waafaajinta naxweed ee saddexdaas eray ee weedhu ka kooban tahay.

Is beddelkan fal ka horreeyuhu waxa uu aad u sii qeexmayaa marka ay rugta magaca degaan magac-uyaallo, sida:-

14 - i) waan tagaa
ii) wuu tagaa
iii) waad tagtaa
iv) way tagtaa
v) waannu tagnaa
vi) waynu tagnaa
vii) way tagaan
viii) waydin tagtaan

Sidii hore oo kale waxa aan u qaybin karnaa lifaaqyada dhaddig iyo lab oo dhamaantood ah afar kooxood: «-aa», «taa», «naa», iyo «aan» labada lifaaq ee ugu dambeeyaa ma waafajisna xidhiidhka magac-u-yaal iyo caynkiisa, maxaa yeelay labaduba waxa ay ahaan karaan dhaddig iyo lab. Halkan ma jiraan laba fal ka horreeyo oo isku si isu beddelay, erayga «way» maahee. Middani waxa ay cadaynaysaa in ay fal ka horreeyayaashu ku sidkan yihiin magac-u-yaalka, beddelina karaan marka ay magacuyaalladu ka maqan yihiin rugtooda, sida tusaalaha ka muuqata. Erayga «way» oo ka duwan fal ka horreeyayaasha kale waxa egman kara magac-u-yaallada «iyada» iyo «iyaga», laakiin lifaaqa «-aan» ee falka la socda ayaa gaar ahaan u taagan caynka iyo hawsha magacuyaalka «iyaga».

Guud ahaan dulmariddan koobban waxa lagala soo bixi karaa in uu is beddelka erayeed ka qaato qayb weyn cilmi ahaan Af-Soomaaliga, markaas kobcinta iyo horumarinta afku waxa ay u baahan yihiin haybin iyo baadhis ka ambaqaadaysa is beddelka erayada, taas oo dhidibbada u aasi karta fidinta, garashada iyo cilmiyaynta Af-Soomaaliga.

# Wajiyada suugaantii gumeysidiidka

— GAARRIYE —

«Isma suurad naqaanno

Isma sawrac kasayno

Isma sawd garanayno

Saraakiisha caddaankaay

Asalaamu calaykum....»

Tuducan waxa ku bilaabma gee raar hal qarni jiray. Waxa tiriyey oday ka mid ahaa guurtidii, magaalada Berbera, mucaahadada kula saxeexday Ingiriiska. Waqtigaasuna wuxuu ahaa markii u horreysay ee gumeystahaasu soo cagacageeyey gobollada Waqooyi.

Geeraarkaa waxaa ka muuqata jidhdiid iyo shaki. Wuxuu gabayaagu, hor iyo horraanba, muujiyey sida aanay «gaalkaas» isugu af ahayn, isugu dhaqan ahayn, isuguna ekayn.

Arrintu si kasta ha ahaatee, intii ay gumeystayaashu dhulka fadhiyeen, waxay Ummaddu kula jirtay halgan af iyo addinba leh, halgankaas oo ka afka ihi u badnaa suugaan. Haddaba, hadday-nu is nidhaahno suugaantaa iyada ah ka baaraandega, ka fursanmaynno inaynu kala qaybinno. Anigu sidaan u qaybin lahaa waa isdatan:

a) Suugaantii caabbiga gumeysiga.
b) Suugaantii Gobannimodoonka.

Haddaan ku horreeyo suugaanta caabbiga, waxa ka mid ah geeraarka aan maqaalka ku bilbaabay. Suugaantaasu waxay sawiraysaa sida markii ugu horraysay uu ninka Soomaaliyeed u arkayey gumeystaha. Waa ka hor taggii soo gelistiisa. Waxa ka muuqata diidmadii iyo firkannaxii dadka ku dhacay, markii caddaanku ku habsaday.

Suugaantaasu waxay ku aaddanayd intaanu gumeystuhu aad u xididaysan, dhibaatadiisana aan wax badan laga arag. Waxa qofka Soomaaliga ihi gumeystaha u arkayey, gaal Ilaahay ka go' ay, oo ay kala diin yihiin. Dagaalka suugaaneed ee uu kula jirayna muu ahayn mid uu gobannimo kaga doonayo. Wuxuu ahaa mid uu Eebbihiisa janno ka rabay. Wuxuu ahaa dagaal meelo uga eg kuwii «Sabiiliga» ahaa, ee la isku hayey muslin iyo gaalo — sibiil yaa muuminiin. Waxa halhays noqotay «jannaa dagatay». Dadku muu kasayn in waxa, run ahaan dagatay, ay ahayd gobannimo «Gaalo iyo wixii jecelow jab» ayaa ku jirtay halkay maanta ku jirto, «gumeystaha cusub iyo ka duugga ihiba ha dhaceen».

Suugaanteenna Gobannimadoonka rasmiga ihi, waxay ifka aragtay kaddib markii Kacaankii «Boloshafiggu» adduunyada gilgilay. Waxayna heerkeedii ugu sarreeyey gaadhay intii ka dambaysay Dagaalkii Labaad Suugaantii asxaabta. Waqtigaas waxaa aad u xoogeystay dhaqdhaqaaqii gobannimadoonka Adduunka, oo aad inoo saameeyey.

Markii u horreysay baa la helay suugaan siinaysa gumeystaha tilmaamo cilmi ah. Markii u horreysay baa suugaanteennu caddeysay, inaan adduunku isu hayn gaalo iyo Muslin; caddaan iyo madow, ee la isu hayo duul la cadaadiyo iyo duul wax cadaadiya.

Markii u horraysay baa gabayaaga Soomaaliyeed ka xoroobay qoqobkii qabiilka. Wuxuu ogaaday inuu yahay xubin ka mid ah qaranweyne. Markii u horreysay baa masraxa lagu kaabay maansadii guubaabada ahayd, Intaas oo astaamood iyo kuwo kale ayey suugaanta gobannimadoonku kaga duwanayd tii caabbigii gumeysiga, ee yacyacoodka ahayd.

Labadaas marxaladood ee suugaantii waqtiga gumeysigu soo martay waxa dhexdooda ku jiray suugaantii Daraawiishta. Suugaanta Daraawiishtu waxay aniga iigu muuqataa inay xidhiidhiye (Transition) u ahayd labadaa xilli.

Qabyaaladda iyo guubaabada wejiga diiniga lihi; waxay gabayada Sayidka wax la wadaajinayaan marxaladdii caabbiga gumeysiga. Hase ahaatee sannadihii dambe, markii halgankiisii gahayray, waxay gabayadii Sayidku u xuub siibteen qaar kuwiisii hore ka bisil, gumeysigana sidii hore si ka qoto dheer uga hadla.

Intaas haddaan idhi, aan isku dayo inaan tusaalooyin ka bixiyo suugaantii caabbiga ahayd. Waxaad eegtaa diidmada iyo jidhdiidka ay la maaxdumayso.

**Maxay badisaa**

**Ama badataa**

**Baabuur hawliyo**

**Boolis qaadiyo**

**Belay aragtaye**

Wiilkaas geel-jiraha ihi wuxuu geeliisa caano badin waayey, tiradiisuna badanwayday u aanaynayaa waxan cusub ee aanay arki jirin, ama gaalo iyo camalkeed ah.

*Allow gorayeey*

*Boolis guuriyo*

*Gaalka saynta leh*

*Geeska kaa mari*

Wiilkanna wuxuu geeliisa uga ducaynayaa waxaa aannu arki jirin:

*Wallee gaydhooy*

*Gumeysiga jaan*

*Nin garaad loo*

*Gaashaan qaadiyo*

*Geela wow halis*

Wiilkanuna wuxuu uga warramayaa geeliisa, uu carraabinayo inuu gumeysigu dadka iyo geelaba u daran yahay.

*Allow seenyooy*

*Siibad aanad gelin*

*Oo surwaallo xun*

*Saanad kugu didin*

*Oo sarkaal cadi*

*Senti taaniyo*

*Sooldi kaa bixin.*

Ninkanuna riyihiisii ayuu uga ducaynayaa dhibaatooyinka uu la yimid caaddanku.

Ugu dambeystii waxaynu soo qaadanaynaa gabaygan da'da weyn ee uu leeyahay Faarax Nuur (1862-1932). Gabaygan wuxuu kaga warramayaa sida dhulka loo qaybsaday iyada oo aan la ogeysiin. Hase ahaatee wuxuu gumeysiga iyo dhibaatooyinkiisa u arkayey astaamo ka mid ah kuwii «aakhiru-sebenka» loogu asteeyey. Wuxuu yidhi:

Ingiriis Amxaariyo Talyaani way akeekamiye

Arligaa la kala boobayaa nin u itaal roone

Anse ila ah aakhiru sebaan iligyadiisiiye

Orgigaa riyaha taadaxoo oodda faaliga e

Waa duni hablihi loo ogaa aqalka diideene

Anse ila ah aakhiru sebaan iligyadiisiiye

Waa duni la kala iibsadaan nala ogeysiine

Waa duni ninkaad aamintaa kuu abees yahaye

Anse ila ah aakhiru sebeen iligyadiisiise

Waa duni xaqii la arkayaa la arjumaayaaye

Waa duni akhyaartii lahayd iibku-doon tahaye

Anse ila ah aakhiru sabeen iligyadiisiiye

Afka iyo adduunkaa hadloo oodan sadarkiiye

Ninka gacanta midig oodan tahay laga ilroonaaye

Anse ila ah aakhiru sebeen iligyadiisiiye

Nimanyahow bal daya xaajada lala aguugaayo Odayaashan loo yeedhayee la anfac siinaayo
Asxaabihii bayna yidhi gaal ha aaminine
Haddaad niman islaamiyo tihiin Aadan ubadkiisa
Oydaan Ilaahay ka go'in hayna oodina e.

# Taariikhdu ma saamixi Doonto kastro

(Ka Yimid Bogga 16aad)

2) Aqoon li'idda Kastro ee Taariikhda iyo Arrimaha gaarka ah ee Geeska Afrika.

3) Iyadoo mushkilad Gobol u khaas ah aan laga dhigi karin mid dunida ka dhexaysa.

4) Kastro oo muujiyey inuu yahay Maskaxda hoggaaminaysa Taliska Itoobiya. Sidaa darteed, Kastro u hadli maayo Kuuba lafahaanteeda markuu ku doodayo «Ma ogolin inaanu cidna kala xaajoono dib u celinta Ciidamadayada jooga Itoobiya».

Guud ahaan, Khudbadda Kastro waxay muujinaysaa labo weji oo kala ah:- Aqoondarridiisa ku saabsan Taariikhda iyo xaqiiqada maanta taalla Geeska Afrika iyo isagoo ah Aalad ay ku shaqaysato Dowlad weyn oo doonaysa inay qabsati Geeska Afrika.

Ugu dambeystii, waxa lagama maarmaan ah in Dowladdaha Dhexdhexaadka ahi ka saaraan Ururkooda Kuuba, mar haddii ay ugu adeegayso dano Dawlad xoog weyn Geeska Afrika iyo Afrika Guud ahaanba. Taariikhdu ku Saamixi mayso Kastri Siyaasadihiisa dibusocodnimada ah ee Geeska Afrika, waafaqsanna Taageeridda Ruushka gumeysiga Xabashida iyo cadaadinta Dadyowga Soomaali Galbeed Abbo iyo Eriteriya.

## ARAGTIDA CILMIGA

# SIDA HANTIWADAAGGU U ARKO HORUKACA TAARIIKHEED

— MAX'D CABDI CALI — (Bayr)

Horukaca taariikheed waa arrin aad iyo aad u murugsan. Waxay la xiriirtaa masalooyin badan iyo maaddooyin kala duwan oo u baahan in dhammaantood la wada tixgeliyo. Si dhab ahaan loo faahmo dabiicadda, micnaha, qaybaha, xaglinta iyo qawaaniinta xukuma horukaca taariikhda waxa loo baahan yahay in loo dejiyo aragti ammuurahaas oo dhan, kala dhambalkooda iyo isururintoodaba, wada koobi karta. Isla markaas waa inay noqotaa aragti inoo ifin karta dhuuxa iyo muuqaalka uu horumarka bulshadu la yimaado, xoogagga wada sababaha keenay, isku dhafnaanta canaasiirtiisa, hababka kala duwan qawaaniinta bulsheed iyo isku xirxirnaantooda. Intaasi waxay ina hanti siisay qaab awood inoo siiya inaynu bulshada si buuxda u aragno iyo wejiyada kala duwan ee horumarkeedu leeyahay .

Habka Hantiwadaaggu (Ma rkismada-Leninisamada) ku indhaindheeyo horukaca bulsheed waa mid hab kale oo idil ka sarreeya. Mudnaantaas iyada ah waxa habkaas ugu wacan sida buuxda, ee midaysan ee uu u abuurayo «Horumarka» isaga oo tixgelinaya dhinacyadiisa oo idil kuwa dabiiciga ah iyo kuwa bulsheed; kuwa maadiga ah iyo kuwa ruuxiga ah, iwm. Aragtida Hantiwadaagga ee sidaas Cilmiga ah ee dhammaystiran mawduucan u kala lafaguraysa, shaki, la'aan waxay liddi ku tahay oo kasoo horjeeddaa dhammaan aragtidayada horukaca bulshadda ka fiirriya dhinac keliya oo hiyi-raac iyo kala dhantaalnaan ku qotoma.

Aragti ahaan iyo axadhahaan hanaanka Hantiwadaaggu wuxuu salka ku hayaa dhabbaha tijaabsan ee laysaga arooro min guud ahaan ilaa gaar ahaan min «abstract» ilaa «concrete».

Hannaankaasi wuxuu si cad ugu qeexan yahay buugga K. Maarkis ee la yiraahdo «Raaselmaal» oo ah buugga Markis kan ugu badan in lagu halqabsado, lagana soo minguuriyo; hase yeeshee ah kan loo akhris yar yahay. Inkastoo buuggaasi si kala dhigdhigan u sawirayo bulshada iyo horumarkeeda iswadka leh, misna arrintaas waxa kale oo lagala kulmi karaa qoraalkiisa kale, gaar ahaan kan ka warramaya idooloojiyadda Jarmalka iyo hordhaca la yiraahdo «Introduction to the critique of Political Economy», ee uu qoray 1859, siddeed sano ka hor intaanu dhigin qaybtii ugu horraysay buuggiisa Raasalmaal. Mabda' ahaan mawduuca ku saabsan horukaca bulsheed wuxuu u baahan yahay in la soo shaac-bixiyo dulucda iyo muuqaallada uu leeyahay iyadoo si daacdnimo iyo cilmi ah loogu soo bandhigayo.

### DULUCDA IYO MUUQAALKA TAARIIKHDA

Habka cilmiga ahi wuxu ina farayaa marka la dersayo ifa-faale kasta iyo taxanaha la soo maray in loo gondadego dulucda shay walba ee aan lagu dawhabaabin dhaldhalaal beenaadka arrimo isbiirsaday ku dheehi karaan ifafaalaha, taasoo ah tan ay ka duulaan culimada burjawaasiyiinta ee casrigani. K. Markis wuxu qabaa in ifafaale bulsheed oo kasta loo eego si maaddi ah oo istar iyo korriin ku jiro. Minguurintan soo socota ayaa Markis ujeeddadiisa aad inoogu caddeysay.

«Marka ay bulshadu ku jirto barwaaqo Tacab ay noloshheeda ku daryeelayso, dadka waxa dhex mara xiriir gaar ah oo lama huraan ah, kana baxsan rabitaankooda. Xiriirkaas oo la yiraahdo xiriirka tacabka ama (wax soo saarka oo ku aaddan marxaladda gaarka ah ee uu marayo korriinka xoogagga wax-soo-saarkoodu.

Isugeynta xiriirkaasi wuxu keenaa dhismaha dhaqaaleed ee bulshada kaasoo sal iyo gun u noqda sharciga iyo siyaasadda bulshadaas lagana garan karo heerka dareenka bulshadeed ku siman yahay. Hadba halka ay gaarsiisan tahay barwaaqada tacabka ama waxsoo-saarka maaddiga ahi waxay guud ahaan saamaysaa nolosha siyaasiga ah, tan ijtimaaciga ah iyo fikriga ah. Wacyiga dadku qabaa inna ma keeno wax-ahaantooda, ee halka ay bulshada kaga jiraan ayaa keenta wacyigooda bulsheed.»

Minguurintan kooban ayaa ina tustay sida Maarkis u arko

korriinka bulshada iyada ayaana muujisay aragtida uu ka qabo Horukaca bulsheed. Habka dhaqan-dhaqaaleed ee bulshadu marayso heerka xoogagga tacabka iyo xiriirka wax soo saarka (sida loo kala leeyahay qalabka wax soo saarka ayaa masawir run ah inaga siin kara bulshadaas iyo saadaasha socodkeeda.)

Hababka dhaqan-dhaqaaleed way iska daba yimaadaan; iska daba-dhacooda ayaa keena bootimaha taariikhda. Xoogagga tacabka oo ah kuwa ugu quwad roon dhinacyada habka wax-soo-saarku leeyahay ee keena horukaca bulsheed ayaa isla markiina ah kuwo korriinkooda ka yimaaddo baahi taariikheed. Baahida taariikhiga ahi waxay ka dhalataa baahida dadka oo intaas sii fiday siina ballaaratay, mid maaddi ah iyo mid ruuxi ahba. Tirada dadka ee kordhaysa, baahidooda tiro ahaaneed iyo tan tayo ahaaneed ayaa u kala saara dabaqado iyo dano dabaqadeed; kuwaas oo soo ifbixiya qawaaniin taariikhi ah oo macquul ah oo kaalmeeya in bulshadu hore u socoto. Iyadoo ay sidaas tahay, ayaa hantiwadaaggu aad u diiddan yahay aragtiyadaha bulshada ku eega si kala googo'an aan wax taxane ahi u dhaxayn ee ku dooda:

1) Hababkii dhaqan-dhaqaaleed ee hore oo idili wax nafci leh innaba ma lahayn .

2) Sidaas awgeedna waa in hababkaas hore oo idil layska dhaafaa aan marna dan laga gelin.

Aragtida Hantiwadaaggu qaabkaas mekaaniga ah way diiddan tahay. Waxay si qummaati ah u tilmaantay sida ay taaiirkhdu u taxan tahay iyo socodkeeda. Waxay kaloo aragtidani noo muujisay astaamaha taxanahaasi caanka ku yahay, astaamahaas oo mudhbax iyo dhaqdhaqaaqyo kor u socod ahi ka buuxaan; taxanahaasi wuxu had walba uurka ku sitaa waxyaabihii fiyoobaa ee dhaqan-dhaqaalayaashii hore, xadaaraddoodii (illbaxnimadoodii), dhanqankii insaaniga ahaa ee isbiirsaday, isla markaasna wuxu soo jiidayaa hab dhaqan-dhaqaale oo hor leh, kii laga gudbayana ka heer sarreeya, kaasoo ku yimaadda kacaan Bulsheed.

Si kastaba arrini ha ahaatee qoto-dheerida hantiwadaagga cilmiga waxay ku jirtaa tixgelinta ay ku wada qaaddo isku-xirnaanta shay kasta iyo ifafaalihiisa iyo sida ay isugu dhafanyihiin gaar ahaan marka la-eego sida ay u sameeyaan soo ifbaxa aqoonta maskaxeed iyo kaalinteeda. Waa arrintaas lafteeda tan qaabka u fasira socodka taariikhda, shayga iyo ifafaalaha si mekaanik ah oo kala gogo'an soo qaawisa wax-ma-tarkiisa.

Aragtida cilmiga ah ee Hantiwadaaggu ku hirataa waxay u aragtaa horumarka taariikheed mid wada xiriirinaya xilligii ina dhaafay iyo kan la marayo, halkaasna saadaal habboon ka bixisa majaraha mustaqbalku raaci doono. Aragtida hantiwadaaggu waxay saadaal ka bixisaa dhinaca Ammuuruhu u xaglindoonan mustaqbalka, kumase tahan-baabto inay si sugan oo marag madoonto ah u caddayso.

Runnimada aragtida cilmiga ah, furnaanteeda, iyo koobideeda ay wada koobto arrimaha wada saameeya horumarka bulshada ayaa awood u siiya in aanay ku ekaan fasirka arrimaha xilligaas dhacaya oo keliya ee isla markaas u suurageliya inay ka soo warbixiso baahida facaadda soo socda iyo sidii loo dhamaystiri lahaa.

Waa socotaa Qaybta 2aad ka akhriso tirsiga soo socda Halgan.

---

**(Ka Yimid Bigga 24aad)**

isna ka hadlay shirka Jaraa'id Mudane Xaamud Maxamed Aadan, wuxuu cambaareeyey siyaasadda foosha xun ee ay gaareen ciidammada huwantu oo go'aan ku gaaray inay baabi'iyaan tirtiraanna shacbiga Eriteriya ee uu halgamaaya Madaxbannaanidooda iyo midnimadooda.

«Quwadahaas isku biirsaday inay laayaan shacbiga Eriteriya, ujeeddadaasi waxay khilaafsan tahay siyaasadooda ay had iyo jeer ku dhawaaqaan ee ah inay kaalmo u fidiyaan dadyowga u halgamaya xornimadooda, hase yeeshee, ay haatan isu beddeleen inay cabburiyaan dadyowga u halgamaaya inay ka taliyaan aayahooda», ayuu caddeeyey Mudane Xaamud.

Madaxda Jabhadda Xoreynta Eriteriya waxay ugu baaqeen Ururrada Qarammada Midoobay, Midowga Afrika, Jaamacadda Carabta iyo dhammaan Ururrada Caalamiga ah iyo dadyowga Nabadda jecel inay ka hortagaan khatarta ka aloosan dalka Eriteriya, taasoo ay ku tilmaameen inayan ku ekaan doonin Gobolkaasi ee ay gaari doonto jasiiradaha waddammada Carabta iyo Afrikaanka.

## Buugaagta iyo Qoraallada

# Khudbaddii Xoghayaha Guud ee XHKS ee Koowda Maajo

Waxaa farxad weyn inoo leh inaan halkan ku kulanno, si aan u qiimeyno xuska iyo qadarinta 1da Maajo maalinta Shaqaalaha Adduunka, isla markaasna ah, Sannadguuradii 1aad ee Xiriirka Guud Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed.

Haddaba, waxaa sharaf weyn ii ah inaan halkaan uga jeediyo salaan diirran iyo bogaadin dhammaan Shaqaalaha Soomaaliyeed meel kasta ha joogee, sidoo kale, waxaan u hambalyeynayaa Shaqaalaha Adduunka, oo maanta u dabbaaldegaya maalinta weyn ee Shaqaalaha.

Waxaa Shaqaalaha Soomaaliyeed u rajeynayaa inay ku guulesstaan halganka ay ugu jiraan horukaca iyo midnimada ummaddooda. Shaqaalaweynaha Adduunkana waxaan la jeclahay inay ka guuleystaan dhiigmiiradka, dibusocodka iyo imberiyaaliyadda ay dagaalka kula jiraan.

Jaalleyaal,


Taariikhda bulshada aadamigu waxay inoo caddeysay kaalinta lixaadka leh ee Ururrada Shaqaaluhu ka qaataan horukaca nolosha maadiga ah ee aadamiga. Shaqaalaha oo quraa ayaa mudnaan, awood iyo karti u yeeshay inay beddelaan nolosha bulshada, in ay xoojiyaan halganka dabaqiga ah ee Xoogsatada inay curiyaanna Kacaan Hantiwadaag ah, inay dhisaan nolol cusub oo aan qofna qof ku dul noolayn.

Shaqaaluhu waxay si toos ah ugu logmaan dhiigmiiradka Hantigoosadka, kadeedka iyo midiidinsiga gumeysiga.

Taasaana ku khasabtay Shaqaalaha inay dagaal joogto ah ugu jiraan xaqiijinta ujeeddooyinkooda iyo himilooyinkooda, isla markaana, u horseedaan xoogsatada inteeda kale dhismaha bulsha cusub ee salka ku haysa sinnaan iyo caddaalad. Sifooyinkaas oo idil ayaa Shaqaalaha ka dhigay horseedka bulshada, taasaana khasabtay inay samaystaan Ururro Shaqaale oo u dagaallama xuquuqdooda iyo danahooda dabaqiga ah.

Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed waxay leedahay waayaheeda u gaarka ah, Shaqaalaha Soomaaliyeed wuxuu ku dhex nool yahay waayahaas oo saameeyey noloshiisa wax-qabadkiisa iyo garaadkiisa. Inkasta oo kacaankii 21kii Oktoobar iyo X.H.K.S. si joogta oo taxane ah u soo hooyeen guulo fara badan oo isdabajoog, waxtarna u yeeshay kor u qaadidda nolosha dadweynaha Soomaaliyeed, haddana waxaa xaqiiqa ah inayan xoogsatada qaarkeed gaarin heerkii bisaylka ee loo baahnaa. Sababta ugu weyn ee dhalisay dhibaatadaas waxay tahay dhismaha dhaqan dhaqaale ee bulshadeennu ku soo abaabtay Fikredda Qabiilka, kasmada bulshada oo hooseysa awgeed.

Qabiilku waa cadawgeenna ugu weyn ee hakinaya halganka iyo horukaca bulshada Soomaaliyeed, waa kan hortaagan hodannimada iyo barwaaqada, dhaawacaya midnimada Ummadda, ka luminaya kalsoonideeda waa kan u adeegaya danaha Imberyaaliyadda iyo dibusocodka, kuwaasoo ka dhiganaya qalabkii ay ku fushan lahaayeen ujeeddooyinkooda. Waxaase hubaal ah taariikhduna caddaysay in qabiilku yahay in Shaqaaluhu noqdaan kuwii baabi'in lahaa.



Waxaa kaloo dhibaatadaas sii xoojinaya dacaayadda imberyaaliyadda, buunbuuninta iyo huuhaada dibusocodka tashwiishta gumeysiga oo dhammaantood raadinaya curyaaminta socodka Kacaanka, daafacayana danaha dabaqadahooda.

Sidaas darteed, waxaa loo baahan yahay in Shaqaalaha ay noqdaan sababihii iyo ilihii koritaanka dhaqaalaha xoojinayey. Koritaanka dakhligooda iyo guud ahaan horumarinta noloshoodu, waxay si toos ah ugu xiran tahay, marka bulsho Hantiwadaag ah la dhisayo, hadba sida ay u kordhiyaan tacab soo saarka, alaabta lagama maarmaanka u ah nolosha Ummadda, iyo hadba heerka uu joogo garaadkooda siyaasiga ahi. Taasoo inoo muujinaysa in hadba shaqaaluhu dhibkuu galo dheefteeda mudanaya.

Kacaanka 21ka Oktoobar kuma uusan ekaannin inuu kordhiyo Shaqaalaha tiradooda oo keliya ee wuxuu qaaday tillaabooyin cadcad ee ku saab san daryeelka danaha guud ee Shaqaalaha, xagga abaabulka, dhaqaalaha iyo ballaarinta awooddooda intaba.

Sidaa daraaddeedna Kacaanku wuxuu soo saaray sharciyo fara badnaa kuwii ugu dam beeyey oo la soo saaray sannadkii 1977kii waxaa ka mid ahaa:

Sharciga Farsamoyaqaannada ee soo baxay 1.5.1977 wuxuu aad u dhiirri geliyey Shaqaalaha Farsamada, gacanta. Wuxuuna ka mid noqday tillabooyinkii ugu weynaa ee dib u habaynta mushaharrada Shaqaalaha kana mid ahaa isla mar ahaantii bartilmaameedka Kacaanka xagga shaqada iyo horumarinta.

Si loo hirgeliyo sharcigaas, waxaa la dhisay Guddi Qaran ee Farsamooyaqaannada.

Imtixaannada oo weli socda ilaa maanta shaqaalihii ka faaiidaystay waxaa lagu qiyaasay inay dhan yihiin 11.225 qof, waxayna isugu jiraan qaar dhaqaale ahaan uga faa'iidaystay iyo qaar uga faa'iidaystay xagga aqoonsiga oo Shahaado ku helay ama ogaaday inta aqoontoodu la'eg. Shaqaaluhu wuxuu wakiillo joogto ah ku leeyahay Guddiyo fara badan, oo heer Qaran ah lana xiriira amuuraha Shaqaalaha khuseeya. Guddiyadaas waxaa ka mid ah:

b. Guddiga Baarista Dacwooyinka Shaqaalaha Dawladda iyo Dadweynaha.

t. Guddiga Dhaqaalaha Qaranka.

x. Guddiga Hirgelinta sharciga Farsamoyaqaannada.

kh. Guddiga Qorshaynta Qaranka.

d. Guddiga dallacaadda iyo abaalmarinta.

r. Guddiga wax iibsiga iyo Qandaraasyada iyo horumarinta.

Guulahaas kor ku xusan iyo kuwo kaleba waxay inoo saadaalinayaan aayatiin wacan.

Kacaanka ka hor Shaqaaluhu waxay u loognaan jireen gumeysiga iyo dibusocodkii gudaha, kuwaasoo u diiddanaa horumar lagana dhex abuuri jiray tafaraaruq asagoo xaqiraya farsmoyaqaanka iyo kuwa danyarta ah.

Waxaa loo baahan yahay in shaqaaluhu ilaaliyaan Miraha Kacaanka ee saldhigga u ah ambaqaadkooda iyo halgankooda dambe, maadaama Kacaanku uuna qiima yeelan karin, haddii uusan isdaaficin .

Waxaa isweydiin leh, waa maxay kaalinta Ururrada Sha qaaluhu ka qaataan horumarka Dalka? Jawaabtu waxay tahay: Shaqaalaha Soomaaliyeed waxay kaalin aan la illaawi karin oo ammaan iyo billado ay ku muteysteen ka soo qaataan hawlihii isdabajoogga ahaa ee dalka lagu dhisayey, iyagoo safka hore bulshada kaga jiray. Waxaa xusid mudan, in markii Kacaanku dhashay, oo la guddoonsaday inaan muruqeenna iyo maskaxdeenna ku dhisno Dalkeenna, innagoo la kaashanayna awooddeenna dhaqaale, ay Shaqaaluhu u bal lan qaadeen mushaharooyinkooda oo ahaa hantida keliya, oo ay haystaan, inay qaar u gooyaan mashaariicda horumarinta Dalka, si dhaqaalaha Dalka kor loogu qaado, shaqaale hor lehna uu halkaas uga abuurmo. Markii uu qaraaraaday halganka Jabhadaha Gobannimadoonka Soomaaliyeed, waxay mar labaad guddoonsadeen inay mushaharkooda iyo xooggooda ugu tabarucaan walaalahooda.

JAALLAYAAL

Imberiyaaliyadda caalamiga ah iyo dibusocodku waxay isku deyayaan inay kufiyaan Kacaanka, si ay u fushadaan danahooda gurracan oo rajcinnimo. Afgembigii dhicisoobay ee dhawaan dad u adeegaya danaha dibusocodka ay isku dayeen, wuxuuna xusuusinayaa inayan weli quusan gumeysiga cusubi iyo kuwa uu ku adeegto, hase yeeshee, waxay moog yihiin, in mar kasta oo ay dibusocodku isku dayaan inay madaxa la kacaan, ay sii kordhayso feejignaan iyo isku duubnaanta dadweynaha Soomaaliyeed, oo aaminsan Kacaankooda, diyaarna u ah daafaca mirihiisa iyo ujeeddooyinkiisaba, ayadoo ay horseed u yihiin Shaqaaluhu .

Waxaynu wada ogsoon nahay 8dii sano ee Kacaanku jiray, in kooxahaas la siiyey fursad badan, hanuunin isdabajoog ah, tusaalayn, qancin, ilaa la gaarsiiyey heer ay kaga qaybgalaan maamulka iyo dhis

maha dalka, ayadoo ujeeddadu ahayd in dadkaas la toosiyo loona muujiyo inuu Kacaanku cadowtinnimo gaar u qabin ciddii diyaar u ah dhismaha dadkeeda iyo dalkeeda, hase yeeshee, waxaa la gaaray maanta waqti aanan dib dambe loogu dulqaadan karin canaasiirta ka soo horjeedda socodka toosan ee Kacaanka iyo dhismaha Hantiwadaagga Cilmiga ah, waxaana la guddoonsaday, inaan dib dambe loogu naxariisan lana mariyo mudankooda.

JAALLAYAAL,
Dhibaatada ka taagan Geeska Afrika ,Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya wax badan ayey caddaysay haddana ku adkaysanaysaa inay arrintaasi tahay arrin labo Qaran ee Afrikaan ah ka dhexaysa, labo shacbi oo deris ahna dhextaal waxyaabaha ay isku hayaan ee ay isku afgartaanna, waxay maslaxad u tahay dhammaan shucuubta u tahay dhammaan shucuubta ku nool Gobolka, ayaga ayeyna jirtaa inay u helaan xal dadnimo iyo Afrikaannimo.

Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya waxay u arkaysaa inay tahay waajibkooda mabdi'iga ah inay garab istaagaan dhaqdhaqaaq kasta ee Gobannimadoon ah, sida Koonfur Afrika, Namiibiya Falastiin, Soomaali Galbeed, Abbow iyo Eriteriya, shucuubta S o o m a a l i Galbeed, Abbow iyo Eritereya waxaan u ark a y n a a inay u dagaalamayaan xuquuqdooda aadaminnimo iyo inay ka tashadaan aayahooda, sidaas darteed, ayaa Kacaanka Soomaaliyeed uusan marnaba dib uga laabmeyn u hiilinta iyo taakulaynta Jabhadaha Gobannimadoonka.

Soo dhex galka ay soo dhex galayaan quwado shisheeye arrinta Geeska Afrika, waxay sii kordhinaysaa xiisadda iyo qalalaasaha, waxayna sii fogeyneysaa isku soo dhawaansho la gaaro iyo xal ka gaaridda dhibaatadaas. Sidaas awgeed, ayaa waxaan ku adkeysanaynaa inay xoogagga shisheeye ka baxaan Gobolkan, ummadaha ku noolna u daayaan inay arrimahooda ka tashadaan kuna dhammaystaan sida maslaxadda ummadahooda ku jirto.

Ugu dambayntii, waxaan aad ugu hambalyeynayaa Shaqaalaha Soomaaliyeed meel kasta ha joogee munaasabadatan u dabbaaldegaya Sanadguuradii 1aad ee xiriirka Guud Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed, waxaana u rajeynayaa sannadka soo socda inay ku guuleystaan fulinta waajibaadka ballaaran ee hor yaal. Sannadkii ina soo dhaafay, oo aad gu'jirsateen, wuxuu ahaa sannadkii iddiinku dhib badnaa, maxaa yeelay, wuxuu ahaa sannadkii aad lugaha isku taageyseen (dhismaha xafiisyadii abaabulka Shaqaalaha dhidibbo u aasidda iyo taabbogelinta qaabka dhismaha Xiriirka Guud, abuuridda ilo dhaqaale hor leh, isbaridda Ururro Shaqaale fara badan ee dibadaha), si aad sannadkan soo socda si buuxda u gudagashaan gudashada waajibaadkiinna.

Waxaan idinkula dardaarmayaa inaad meel uga soo wada jeesataan ka hortagga cadowga Kacaanka iyo Hantiwadaagga kuna dadaashaan kordhinta tacabka, hantida Ummadda, ilaalinta dhaqangelidda Siyaasadda XHKS, Sharciyada lagu Horumarinayo dhismaha dhaqaalaha Dalka guud ahaan, gaar ahaanna loogu danaynayo danyarta dulman.

**GUULEYSTA. GUULEYSTA. GUULEYSTA.**

**HA MIDOOBO SHAQAALAHA ADDUUNKU.**
**HANTIWADAAGGU HA HIRGALO.**
**UMMADDA SOOMAALIYEED HA WADA XOROWDO HANA ISRAACDO.**
**GUMEYSIGU HA DHACO.**

Khudbaddii Xoghayaha Guud ka hor waxaa khudbad warbixin ah Jeediyey Jaalle Maxamuud Cali Axmed Guddoomiyaha Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed, kana tirsan Golaha Dhexe ee XHKS Khudbaddaas oo uu ku yiri:

1da Maajo Taariikh ahaan ka sokow waa maalinta Xisaabtanka iyo qiimeynta wax qabadka Shaqaalaha, tartanka hawlaha lagu horumarinayo bulshada, tilmaansiga sidii lagu gaari lahaa guulo hor leh oo u danaynaaya shaqaalaha, waa maalin lagu soo cusboonaysiiyo tabaha iyo Xeeladaha halganka shaqaalaha maalintaas xusuusta weyn leh isla markaas ku aaddan tahay sannad guuradii 1aad ee Xiriirka Guud ee Shaqaalaha.»

Jaalle Maxamuud wuxuu yiri isagoo ka hadlaaya hawlihii Xiriirku soo qabtay sannadkii ina soo dhaafay.

Wuxuu Xiriirku xoog saaray sidii uu u d e j i n lahaa una abaabuli lahaa qorshe hawleed shaqada u kala qayxa waaxaha iyo hay'adaha kala duwan ee Xiriirka Guud, iyo sidii uu Xiriirka Guud iyo sidii uu dhismihiisa uga taabba gelin lahaa dhammaan Gobollada, Degmooyinka dalka ujeeddooyinka ugu waaweyn ee kormeerkuna waxay ahaayeen:

— Hubinta heerka fulitaanka barnaamijka Shaqada ee Xiriirka iyo ku dhaqanka Xeerkiisa.

Isku Xirnaanta iyo wada

shaqaynta guddiyada Ururrada Shaqaalaha.

— Hubinta fulitaanka Hanuuninta, tababarada iyo doodaha Shaqada iyo Shaqaalaha.

— Baarista iyo habaynta Xisaabaadka Sanduuqa Shaqaalaha.

— Xog waraysiga wada shaqaynta Ururka shaqaalaha, maamulka iyo Xisbiga ayuu yiri, Jaalle Maxamuud.

Wuxuu kale oo caddeeyey Jaalle Maxamuud in Shaqaalaha Soomaaliyeed taageero buuxda siinayo loollanka xaqa ah ee dabaqadda shaqaalaha iyo dadyowga u halgamaaya Madaxbannaanidooda.



# Khudbaddii Xoghayaha Guud ee XHKS ee xiritaankii aqoon isweydaarsigii Warfidiyeennada

Bisha Maajo 22dii Xoghayaha Guud ee XHKS wuxuu aqoon isweydaarsi ugu xidhay Madaxtooyada Warfidiyeenka Soomaaliyeed oo muddo 12 maalmood ah aqoon isweydaarsigaasi u socday. Waxaanu halkan idin ku soo gudbinaynaa hadalladan nanu ka soo dheegannay khudbaddii Madaxweynaha:

«Qorayaasha iyo Mu'allifiinta waa afhayeenka ummadda, iyaga ayaana gaarsiiya Dadweynaha Siyaasadda Kacaanka ee xag dhaqaale waxbarasho iyo bulshannimo intaba».

Qorayaasha iyo mu'alifiintu waa inay siyaasad ahaan iyo maskax ahaan u bislaadaan, oo garaadkooda Siyaasiga ah heer sare ahaado, markaa ayey u baahin karayaan ummaddooda himilooyinka Kacaanka iyo halka ay higsaneyso ummaddu oo ah horumar iyo baraare.

Mar haddii aynu ognahay in waxa abuuri kara qiimaha qarannimo ay tahay aqoonta iyo cilmiga farsamo, iyadoo dunidana tadawur sameyneyso maalinba maalinta ka dambeysa, ayaa Kacaanka Siyaasaddiisu ku dhisan tahay in hore loo mariyo lana kordhiyo layliga la siinayo hawlwadeenka ummadda.

Qorayaasha iyo mu'alifiinta Soomaaliyeed xil ballaaran ayaa ka saaran xagga horumarinta ummaddooda iyo sare u qaadidda garaadka iyo kasmada siyaasiga ee bulshada si ay u gaarsiiyaan dunida kale ee hore u martay. Himilada Kacaanku waxay tahay in qof walba loo tababaro xirfaddiisa gaar ahaaneed si uu ugu yeesho aqoon iyo awood, taasoo sii kordhinaysa wax qabadkiisa iyo kartidiisa.

Hanjabaadda Xabashida maaha mid Mengiste ka timid, balse waa mid Ruushka iyo xulafadiisa ka soo baxaysa. Cid allaale ciddii isku dayda inay soo weerarto JDS ku guulaysanmeyso, waxayna la kulmi doontaa khasaare iyo jab xoog leh. Ummadda Soomaaliyeed waxay diyaar u tahay inay daafacdo midnimadeed, sharafteeda iyo qarannimadeeda. Ciidammada huwanta ahi waxay doonayaan inay Soomaaliya khasab uga noqoto taageerada gobannimadoonka. Taageerada aynu gobannimo doonka u fidinnaa waa mid waajib iyo taariikhiba ah, jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliyana way sii wadi doontaa taageerada xaqa ah ee ay u fidinayso dadyowgaa u halgamaya xorriyaddooda iyo ayaa ka talintooda.

Soomaaliya ma waddo mana joojin kareyso dadka u dagaallamaya xornimadooda; cid joojin kareysaana ma jirto ilaa ay dadkaasi ka gaaraan xuquuqdooda aadamiga oo ah madaxbannaanidooda.

Waxaan idin kula dardaarmayaa inaad sii kordhisaan Iskaashiga taasoo idiin fududeynaysa gudashada waajibaadkiinna qarannimo, taasoo sii kobcinaysa wax-qabadkiina iyo waxtarkiinna ummadeed, waxaan idinku adkaynayaa inaad sii kordhisaan dadaalkiinna iyo feejignaantiinna, maadaama hawsha ummaddu idinka sugeysaa tahay mid aad u ballaadhan. Ma jiro kala qodob ku dhex jira maamulka iyo shaqaaluhu. Dhammaanteen waxay u nahay shaqaale maalaya muruqooda iyo maskaxdooda, waxaynu u adeegeynaana waa ummadda».

# Khudbaddii Xoghayaha Guud ee XHKS ee 15kii Maajo

Xoghayaha Guud ee XHKS Madaxweynaha JDS, Jaalle Maxamed Siyaad Barre wuxuu habeenkii 15ka Maajo ka qayb galay riwaayad lagu maamuusayey maalinta 15ka Maajo oo ah maalinta Dhallinyarada Soomaaliyeed, isla markaana ah sannadguuradii kowaad ee ka soo wareegtay asaaskii Ururka Dhallinyarada Kacaanka Soomaaliyeed oo lagu qabtay Golaha Murtida iyo Madadaalada ee magaaladan Muqdisho.

Halkan waxaan idiinku soo gudbinaynaa qayb ka mid ah khudbaddii qaayaha lahayd ee munaasabaddaas uu ka jeedshay Jaalle Siyaad:-

Jaallayaal, Dhaqdhaqaaqyadii gobannimadoonka ee ay billaabeen geesiyiintii Axmed

Gurey, iyo Sayid Maxamed Cabdulle Xasan waxay ku fadhiyeen fikrad waddani ah oo ay ku dheehan tahay xurriyad jaceyl kana horyimid kadeedkii gumeysiga.

Sannadkii 1943kii Ururkii siyaasiga ahaa ee ay asaaseen dhallinyaradii 13ka ahayd wuxuu ahaa mid ka shiidaal qaadanaya halgankaasi soo taxnaa, iyadoo ururkaasi uu gaaray meel kastoo ka mid ah dalkeenna ilaa iyo inta dalka uu ka gaarsiiyo xornimo taam ah

Dawladihii u kala dambeeyey taliska dalka waxay meel cidla ah kaga tageen oo ay xabaaleen himilooyinkii waddaninnimo ee ummadda. Mar kaasi sannadkii 1969kii waxa dalka ka curtay kacaan hantiwadaag ah oo u horseedaya ummadda horumar dhan walba ah.

Tan iyo curashadii kacaanka waxaynu ku tallaabsannay guulo waaweyn oo dhaxal gal ah, taasoo dhaxalsiisey in la unko Xisbiga Hantiwadaagga kacaanka Soomaaliyeed oo dhallinyaraduna ay ka mid tahay tiirarka saldhigga u ah xisbiga. Waajibaadka kacaanka waxaa ka mid ah horena uu ugu caddeeyey ballanqaadkiisii koowaad xoreynta iyo midnimada Ummadda Soomaaliyeed.

Xorriyadda iyo horumarka JDS ay gaartay waxay tahay mid kooban inta la gumeysanayo dad Soomaaliyeed lagana xaaraantinimeynayo madaxbannaanidooda siyaasadeed iyo horumarkooda intaba.

Kacaanku isaga oo fulinaya ballanqaadkaasi wuxuu taaggeerayey dadkii u halgamayey gobannimadoonka kale ee adduunka, sidaa darteed ay waajib iyo mas'uuliyad taariikheed ku tahay taageerada iyo gacan-siinta dadka Soomaali Galbeed oo weli ku jira kadeedka gumeysiga.

Naga reebi-mayso handadaadda iyo caga-jugleynta xoogagga shisheeyaha ee indha la'aanta isugu soo riday Geeska Afrika, namana cabsi gelin karto kibirka, iyo tokha Taliska Xabashidu, waxaannu leennahay Xabashi waa is naqaannaa.

Waxaan mar kale ugu baaqeynaa adduunweynaha in arrinta Geeska Afrika la xasiliyo ciidammada shisheeyuhuna ka baxaan, isla markaana dadyowga deggan Gobolkaasi loo oggolaado in ay ka taliyaan aayahooda dambe.

Hubka lagu daldalaayo Gobolkaasi wuxuu yahay mid loola jeedo in dab lagu sii huriyo si ay nabaddu u sii foggaato.

Jaallayaal, waxaan weydiisanaynaa caalamka dhexdhexaadka ah in ay gartaan doorka Kuuba ay ka cayaareyso dunida, kaasoo ah midaan marnaba lagu sifeyn karin kuna socon siyaasad dhexdhexaad ah, waxaana si gaar ah uga codsanayaa dawladaha Afrika iyo Ururka Midowga Afrika in ay mashaakilka ka taagan Geeska Afrika u arkaan arrin Afrikaan oo waxqabadkoodana u baahan.

klaainta Kuuba ay ka cayaarayso Afrika oo wajina isugu muujineyso in ay taageeayso gobannimodoon Afrikana wejiga kalena la dagaallameyso gobannimadoon Afrikaan ah, dawlad Afrikaana oo xor ahna siyaasaddeeda soo fara gelinayso, iyada oo xaqiiqdii u adeegaysa istaraatijyad iyo dano gaar ah.

Waxaan kaloo sheegaynaa in canaasiirta isticmaarka iyo imberyaaliyaddu ay marar badan isku dayeen in ay majaxaabiyaan kacaannimo u dhashay in ay beddelaan nolosha bulshada ummadahooda oo u ahaa horseedka horumarka dhaqaalaha, dimoqraadiyadda iyo nabadgelyada. Isticmaarka wuxuu ka faa'iideystaa rajciyadda gudaha, iyaga oo eeganaya waqtiyo munaasab u ah.

Inqilaabkii dhicisoobay bishii aynnu soo dhaafnay 9dii wuxuu ahaa nooc ka mid ah shirqoollada faraha badan oc ay rajciyaddu u maleegeeysey in ay ku majo xaabiyaan kacaanka, waxaana inqilaabkaasi abaabuley koox milateri ah oo aan wax kalsooni ah ku lahayn shacabka iyo ciidammada midna, kuwaasoo ujeeddoodu ahayd in ay khatar geliyaan jiritaanka kacaanka iyo midnimada Ummadda Soomaaliyeed.

JAALLAYAAL

Waxan farayaa dhallinyarada inay aad ula dagaallamaan qabyaalada oo ah hubka ay ku adeegtaan Kacaandiidku. Waxa qabyaaladdu tahay cudurka ugu weyn ee kacaanku la dagaallamayo.

Waxaan dhallinyarada u rajeenayaa in ay noqdaan kuwa had iyo jeer ka digtoonaada qabiilka, lana dagaallama qabiiliiŝtaha iyo dacaayadda qabaliga ah oo wax loogu dhimaayo Kacaanka iyo midnimada Ummadda Soomaaliyeed.

Waxaan ugu baaqayaa Ururka Dhallinyarada Kacaanka Soomaaliyeed in ay kordhiyaan dadaalkooda iyo feejignaantooda, isla markaana ay diyaar u noqdaan halgan qaraar iyo dagaal ay ku qaadayaan quwadaha dibusocodka ah ee kacaanka ka soo horjeeda.

Ugu dameystii waxaan ammaan ballaaran u jeedinayaa Madaxda Ururka Dhallinyarada Kacaanka, waxaan u rajeenayaa in ay noqdaan kuwii mar kasta ku guuleysta waajibaadka iyo xilka saaran si hufanna u guta.

# TUSAALOOYINKII MADAXWEYNAHA JDS


WAXAA ISWEYDIIN LEH, WAA MAXAY KAALINTA URURRADA SHAQAALUHU KA QAATAAN HORUMARKA DALK?. JAWAABTU WAXAY TAHAY: SHAQAALAHA SOOMAALIYEED WAXAY KAALIN AAN LA ILLAAWI KARIN OO AMMAAN IYO BILLADO AY KU MUTEYSTEEN KA SOO QAATEEN HAWLIHII ISDABAJOOGGA AHAA EE DALKA LAGU DHISAYEY, IYAGOO SAFKA HORE BULSHADA KAGA JIRAY.


Jaalle Siyaad 1.5.1978

---

KACAANKA 12KA OKTOOBAR KUMA UUSAN EKAANNIN INUU KORDHIYO SHAQAALAHA TIRADOODA OO KELIYA EE WUXUU QAADAY TILLAABOOYIN CADCAD EE KU SAABSAN DARYEELKA DANAHA GUUD EE SHAQAALAHA, XAGGA ABAABULKA, DHAQAALAHA IYO BALLAARINTA AWOODDOODA INTABA.

Jaalle Siyaad 1.5.1978



**1st May and the 15th: Dates of Historical significance for Somalia.**



**Hamar Weyne is one of the Historical places in Mogadishu.**